# Siyaasadda Qaran Ee Socdaalka Shaqada

## Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Wasaaradda Shaqada Iyo Arrimaha Bulshada



Supported by:

International Labour Organization

Better Regional Migration Management

UKaid from the British people

# Siyaasadda Qaran Ee Socdaalka Shaqada

## Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Wasaaradda Shaqada Iyo Arrimaha Bulshada

**Waxaa diyaariyey: Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada, 2025**

© International Labour Organization 2025.

First published 2025.

Attribution 4.0 International (CC BY 4.0)

This work is licensed under the Creative Commons Attribution 4.0 International. See: creativecommons.org/licences/by/4.0. The user is allowed to reuse, share (copy and redistribute), adapt (remix, transform and build upon the original work) as detailed in the licence. The user must clearly credit the ILO as the source of the material and indicate if changes were made to the original content. Use of the emblem, name and logo of the ILO is not permitted in connection with translations, adaptations or other derivative works.

**Attribution –** The user must indicate if changes were made and must cite the work as follows: ILO, *Siyaasadda Qaran Ee Socdaalka Shaqada: Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Wasaaradda Shaqada Iyo Arrimaha Bulshada*, Geneva: International Labour Office, 2025. © ILO.

**Translations** – In case of a translation of this work, the following disclaimer must be added along with the attribution: *This is a translation of a copyrighted work of the International Labour Organization (ILO). This translation has not been prepared, reviewed or endorsed by the ILO and should not be considered an official ILO translation. The ILO disclaims all responsibility for its content and accuracy. Responsibility rests solely with the author(s) of the translation.*

**Adaptations** – In case of an adaptation of this work, the following disclaimer must be added along with the attribution: *This is an adaptation of a copyrighted work of the International Labour Organization (ILO). This adaptation has not been prepared, reviewed or endorsed by the ILO and should not be considered an official ILO adaptation. The ILO disclaims all responsibility for its content and accuracy. Responsibility rests solely with the author(s) of the adaptation.*

**Third-party materials** – This Creative Commons licence does not apply to non-ILO copyright materials included in this publication. If the material is attributed to a third party, the user of such material is solely responsible for clearing the rights with the rights holder and for any claims of infringement.

Any dispute arising under this licence that cannot be settled amicably shall be referred to arbitration in accordance with the Arbitration Rules of the United Nations Commission on International Trade Law (UNCITRAL). The parties shall be bound by any arbitration award rendered as a result of such arbitration as the final adjudication of such a dispute.

For details on rights and licensing, contact: rights@ilo.org. For details on ILO publications and digital products, visit: www.ilo.org/publns.

ISBN: 9789220430439 (print); 9789220430446 (web PDF)

**Also available in English:** *National labour migration policy of Somalia*, ISBN 9789220421550 (print); 9789220421567 (web PDF)

The designations employed in ILO publications and databases, which are in conformity with United Nations practice, and the presentation of material therein do not imply the expression of any opinion whatsoever on the part of the ILO concerning the legal status of any country, area or territory or of its authorities, or concerning the delimitation of its frontiers or boundaries. See: www.ilo.org/disclaimer.

The opinions and views expressed in this publication are those of the author(s) and do not necessarily reflect the opinions, views or policies of the ILO.

Reference to names of firms and commercial products and processes does not imply their endorsement by the ILO, and any failure to mention a particular firm, commercial product or process is not a sign of disapproval.

Printed in Ethiopia

**Photo credits**
Cover: © ILO

# Tusmo


**Dulmar kooban oo ku saabsan hirgelinta siyaasaddan** ... 5
- Himillooyinka ... 5
- Hiigsiga ... 5
- Ujeeddada ... 5
- Qiyamka Aasaasiga ah iyo Mabaadi'da Hageysa Siyaasaddan ... 5
- Ujeeddooyinka Istiraatijiyadeed ee Siyaasaddan ... 5
- Mowduucyo is Dhexgala (Cross Cutting Themes) ... 6

Fal gelidda siyaasadda iyo tallaabooyinka la soo jeediyey ... 6
- Qeybta 1: Xoojinta Maamulka Socdaalka Shaqada ... 6
- Qeybta 2: Horumarinta, Tayeynta iyo Aqoonsiga Xirfadaha ... 6
- Qeybta 3: Ballaarinta Illaalinta Shaqaalaha iyo Daryeelka Bulshada ee Shaqaalaha Socdaalaya iyo Qoysaskooda ... 7
- Qeybta 4: Siyaasadda Xoojinta Doorka La hawl galayaasha Bulshada, Bahwadaagta Horumarineed iyo Qeybaha Ganacsiga Gaarka Ah ... 7
- Qeybta 5: Xoojinta Xog ururinta, Maareynta, iyo Faafinta Xogta La Xiriirta Socdaalka Shaqada ... 7
- Qeybta 6: Nidaaminta Skirkadaha Shaqosiinta ee Gaarka ah ... 8
- Qeybta 7: Taageeridda Nidaamyada Dib u soo celinta iyo Dib u dhexgelinta Shaqaalaha Socdaalaya ... 8
- Qeybta 8: Horumarinta Waxtarka Jaaliyadaha Soomaaliyeed ee Qurba joogta Ah ... 8

Hannaanka Fulinta Siyaasaddan ... 9

Fursadaha Maalgelinta ... 9

Gaarsiinta Iyo Faafinta Siyaasaddan ... 9
- Gaarsiinta Xukuumadda Iyo Hay'adaha Kale ee Dawladda ... 10
- Gaarsiinta La Hawlgalayaasha Bulshada ... 10
- Gaarsiinta Shaqaalaha Socdaalaya (Gudaha iyo Dibadda) ... 10
- Gaarsiinta Dawladaha Dalalka Martida Loo Yahay ... 10

Kormeerka Iyo Qiimeynta Siyaasadda ... 10

Soo gaabin erayo iyo waxay u taagan yihiin ... 11

**1. Hordhac Iyo Falanqayn Xaaladeed** ... 14
- 1.1. Xogta Dadweynaha, Dhaqaalaha iyo Xaaladda Shaqooyinka ... 14
- 1.2. Muuqaalka Shaqada iyo Baahida Kor u qaadista Xirfadaha Si Tartiib Tartiiib Ah ... 15
- 1.3. Muuqaalka Socdaalka Soomaaliya ... 16
  - 1.3.1. Qaxootiga iyo Magangelyo doonka ... 16
  - 1.3.2. Socdaalka Soogalootiga ... 16
  - 1.3.3. Socdaalka Shaqaalaha Dibadda ... 17
  - 1.3.4. Ka qeybgalka Jaaliyadaha Soomaaliyeed ... 17
  - 1.3.5. Lacagaha ay Dibadda Ka Soo Diraan Jaaliyadaha ... 17
- 1.4. Qaabdhismeedka Maamulka Socdaalka Shaqada ... 17
  - Xaaladda Dhibaatada iyo Sababaha Aasaasiga ah ee Siyaasaddan ... 18
- 1.5. Sababaha Aasaasiga ah ee Siyaasadda ... 19
- La tacaalidda Arrimaha Jinsiga ... 19
- Ku saleysanaanta Xuquuqda ... 19

**2. Jihada Istiraatijiyadda** ... 20
- Aragtida ... 20
- 2.1. Himillada ... 20
- 2.2. Ujeeddada ... 20
- 2.3. Qiyamka Asaasiga ah iyo Mabaadi'da Hageysa Siyaasaddan ... 21
- 2.4. Ujeeddooyinka Istaraatijiyadeed ee Siyaasaddan ... 22
- 2.5. Mowduucyada Is dhexgala ... 22

**3. Tallaabooyinka, Farogelinada Iyo Hababka Siyaasaddan** ........ 24
Qeybta 1: Xoojinta Maamulka Socdaalka Shaqada si waafaqsan halbeegyada iyo Xeerarka Caalamiga ah ee Shaqada ........ 24
Qeybta 2: Aqoonsiga Xirfadaha iyo Horumarintooda ........ 24
Qeybta 3: Ballaarinta Ilaalinta Shaqada iyo Dammaanadda Bulsho ee Shaqaalaha Socdaalka iyo Qoysaskooda ........ 25
Qeybta 4: Xoojinta Doorka La hawlgalayaasha Bulshada, hawlgalayaasha Horumarinta, iyo Qeybaha Gaarka Loo Leeyahay ........ 26
Qeybta 5: Xoojinta Soo saarista, Maareynta, iyo Faafinta Xogta Socdaalka Shaqaalaha ........ 26
Qeybta 6: Nidaaminta Shirkadaha Shaqosiinta Gaarka ah ........ 26
Qeybta 7: Taageeridda Nidaamyada Soo noqoshada iyo Dib u milanka Shaqaalaha Socdaalka ........ 27
Qeybta 8: Kordhinta iyo Hagaajinta Ka qeybgalka Jaaliyadaha Soomaaliyeed ee Qurbaha ........ 27

**4. Qaabdhismeedka Hirgelinta Siyaasaddan** ........ 28
4.1. Qaabdhismeedka Sharciyada iyo Xeerarka ........ 28
Qaabdhismeedka Qaranka ........ 28
Dastuurka Ku meel gaarka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (2012) ........ 28
Siyaasadda Qaranka ee Shaqosiinta (NEP) iyo Qorshaha Qaranka ee (2019) ........ 29
Qorshaha Horumarinta Qaranka 2020–2024 ........ 30
Xeerka Shaqada Soomaaliya ee Dhaqangalka ah ........ 30
Siyaasadda Qaranka ee Qurbo joogta (2023) ........ 30
Siyaasadda Qaran ee Qaxootiga Soo noqday iyo Barakacayaasha Gudaha ........ 30
Sharciga Shaqo qorista Shaqaalaha Shisheeye (2015) ........ 31
Hab-raaca Shaqosiinta Dibadda (Overseas Employment Guidelines) (2022) ........ 31
Heshiisyada Socdaalka Shaqaalaha ee Labo geesoodka ah ........ 32
Sharciga Maalgashiga Shisheeye 2015 ........ 32
Qaabdhismeedka iyo Heerarka Caalamiga ah Hadafyada Horumarka Waara ee Qaramada Midoobay ........ 32
Hadafyada Horumarka Waara ee Qaramada Midoobay (SDGs) 2030. ........ 33
Heshiisyada Caalamiga ah ee Ururka Shaqaalaha Adduunka (ILO) ee Socdaalka Shaqaalaha ........ 33
Barnaamijka Shaqo Hufan ee Dalka (DWCP 2023-2025) ........ 34
Qaabdhismeedka Kale ee Horumarinta Qaranka ........ 34
Qabyo qoraalka Istiraatijiyadda Socdaalka Qaranka (2024) ........ 34
Qabyo qoraalka Istiraatijiyadda Xalka Waara ee Qaranka (2025-2029) ........ 34
Qabyo qoraalka Siyaasadda Qaran ee TVET Waxbarashada Farsamada iyo Tababarka Xirfadaha ........ 34
Qaabdhismeedyada Heer Goboleedka ah ........ 35
4.2. Hababka Dhaqangelinta Siyaasadda ........ 35
4.3. Dhaqangeliyeyaasha Fulinta, Iskudubbaridka iyo Wada shaqeynta Hay'adaha ........ 36
4.4. Qaabdhismeedka Hay'adaha ........ 37

**5. Maaliyadda Iyo Soo Ururinta Kharashaadka** ........ 40

**6. Hababka Isgaarsiinta** ........ 42
6.1. Gaarsiinta Xukuumadda iyo Hay'adaha kale ee Dawladda ........ 42
6.2. Gaarsiinta Wada hawlgalayaasha Bulshada ........ 43
6.3. Gaarsiinta Shaqaalaha Socdaalka Soo Gelaya iyo Kuwa Ka Baxaya ........ 43
6.4. Gaarsiinta Dawladaha Dalalka Martida Loo Yahay ........ 43
6.5. Helitaanka Fal celinta/Jawaab celinta ........ 43

**7. Qaabdhismeedka Kormeerka, Qiimeynta Iyo Barashada** ........ 44
7.1. Kormeerka ........ 44
7.2. Qiimeynta ........ 45
7.3. Barashada ........ 45

**ERAY BIXIN** ........ 46

# ▶ Gogol-dhig

Socdaalka shaqadu wuxuu door muhiim ah ka qaatay koboca bulshada iyo dhaqaalaha Soomaaliya. Laga bilaabo doorkiisa ku aaddan taageeridda dakhliga qoysaska iyada oo loo marayo xawaaladaha, illaa horumarinta xirfadaha iyo xoojinta adkeysiga qaran, dhaqdhaqaaqa shaqaalaha Soomaaliyeed wuxuu udub-dhexaad u ahaa fursad iyo badbaado u suurtageliyay kumannaan qoys.

Soomaaliya oo ah dal diritaan ee socdaalka shaqada, dal loo soo socdaalo (destination), iyo dal marin ah (transit. Soomaaliya waxa ay ku jirtaa xarunta isbeddellada socdaalka ee gobolka iyo caalamkaba, kuwaas oo isa soo taraya sanadba sanadka ka dambeeya.  Si kastaba ha ahaatee, muddada dheer waxaa dalka ka maqnaa hannaan qaran oo mideysan oo hagaya kana jawaabaya welwelka socdaalka shaqada, taas oo sababtay in shaqaalaha Soomaaliyeed ee socdaalka ah ay u nuglaadaan xaalado aan amni ahayn, xadgudubyo shaqo, iyo ilaalin xaddidan.

Iyada oo laga duulayo arrimahan, daahfurka Istiraatiijiyadda Hirgelinta Siyaasadda Qaranka ee Socdaalka Shaqada ee Soomaaliya iyo Qorshaha Waxqabadka waa tallaabo taariikhi ah oo ku aaddan hagaajinta maareynta socdaalka shaqada. Tani waa istiraatiijiyaddii ugu horraysay ee si dhammeystiran u tarjunta mabaadi'da Siyaasadda Qaranka ee Socdaalka Shaqada, una rogta tallaabooyin wax-ku-ool ah iyo yoolal la cabbiri karo. Istiraatiijiyaddani waxay bixinaysaa khariidad cad oo lagu xaqiijinayo in socdaalka shaqadu noqdo mid badqab leh, nidaamsan, sharciyeysan, oo ku dhisan xuquuqda aadanaha, sinnaanta jinsiga, iyo shaqo wanaagsan.

Istiraatiijiyaddan iyo Qorshaha Waxqabad waxa ay waafaqsan yihiin Hadafyada Horumarka Waara (SDGs), Heshiiska Caalamiga ah ee Socdaalka (GCM), Heshiisyada  Shaqaalaha Aduunka  ee Qaramada middoobay (ILO) kuwaasoo la xiriira socdaalka shaqaalaha, iyo Qorshaha Isbeddelka Qaranka ee Soomaaliya (NTP).

Waxay ku saleysan yihiin mabaadi'da maamul-wanaagga, caddaaladda bulshada, waxayna ka kooban yihiin arrimo isdhexgal ah sida sinnaanta jinsiga, ka mid noqoshada dadka naafada ah, adkeysiga cimilada, shaqo-abuurka dhalinyarada, iyo hal-abuurka dhijitaalka.

Istiraatiijiyaddan waxay qeexaysaa faragelinno gaar ah dhammaan wejiyada kala duwan ee socdaalka, waxayna xoogga saaraysaa isku-xirnaan adag oo u dhexeysa Dowladda Federaalka, Dowlad-Goboleedyada xubnaha ka ah Federaalka, daneeyeyaasha bulshada, iyo bahwadaagta kale.

Sida ku dhacday diyaarinta Siyaasadda Qaranka ee Socdaalka Shaqada, habka loo diyaariyey istiraatiijiyaddan wuxuu ahaa mid baahsan, isugu jira ka-qaybgal, latashi, iyo iskaashi dhow. Waxaa gacan ka geystay hay'adaha dowladda ee heer federaal iyo heer dowlad-goboleed, daneeyeyaasha bulshada rayidka, bahwadaagta horumarineed, matalaadda jaaliyadda dibadda, qaybaha ganacsiga gaarka loo leeyahay, iyo ururrada shaqaalaha. Sidaas darteed, istiraatiijiyaddan waxaa lagu dhisay dood wadaag iyo wada-tashi ballaaran oo hubiya in ay noqoto mid dalka uu leeyahay, deegaanka u gaar ah u dhigma, isla markaana la jaanqaada heerarka iyo hagayaasha caalamiga ah.

Waxaan halkan uga mahadcelinayaa Ururka Shaqaalaha Adduunka  ee Qaramada Middoobay (ILO) oo qayb ka ahaa Barnaamijka Better Regional Migration Management Programme – Phase II, waxaana maalgeliyay Xafiiska Arrimaha Dibadda, Barwaaqo-sooranka & Horumarinta ee Boqortooyada Midowday ee ingiriiska (FCDO), taageeradooda farsamo iyo mid maaliyadeed ee joogtada ah.

Waxaan sidoo kale u mahadcelinayaa dhammaan bahwadaagtii iyo daneeyayaashii ka soo qayb qaatay diyaarinta, talo-bixinta, iyo fududeynta geeddi-socodkan.

Istiraatiijiyadda waxay qeexaysaa siddeed aag siyaasadeed oo muhiim ah—laga bilaabo xoojinta maareynta iyo isku-duwidda socdaalka ilaa nidaaminta wakaaladaha shaqosiinta, adeegyada dib-u-soo-laabashada iyo dib-u-dhexgelinta, horumarinta xogta iyo nidaamyada macluumaadka, kobcinta xirfadaha, iyo daryeelka bulshada ee shaqaalaha socdaalaya. Waxa ay sidoo kale ka kooban tahay Aragti Isbeddel (Theory of Change), Qaab-dhismeedka Natiijooyinka, iyo tilmaamayaal lagu hagayo hirgelinta si joogto ah loo cabbiri karo.

Istiraatiijiyaddan waxay muujinaysaa sida Dowladda Federaalka ee Soomaaliya uga go'an tahay in ay ka faa'iideysato socdaalka shaqada si uu u noqdo tiir muhiim ah oo horumarineed. Waa khariidad wax-ku-ool ah oo lagu dhaqan-gelinayo Siyaasadda Qaranka ee Socdaalka Shaqada, lana xaqiijinayo horumar muuqda oo lagu xoojinayo maamul wanaagga socdaalka shaqada.

Anigoo ah Wasiirka Shaqada iyo Arrimaha Bulshada, waxaan ku faraxsanahay inaan soo bandhigo Istiraatiijiyaddan iyo Qorshaha Waxqabadka oo ah tallaabo aasaasi ah oo lagu horumarinayo maareynta socdaalka, shaqo wanaagsan, iyo horumar guud oo ay ka faa'iideysanayaan muwaadiniinta Soomaaliyeed ee gudaha iyo dibadda ku nool.

Dowladda Federaalka ee Soomaaliya waxa ay mar kale xaqiijineysaa go'aankeeda ku aaddan in la helo socdaal shaqo oo ammaan ah, nidaamsan, sharciyeysan oo joogto ah, iyadoo la ilaalinayo xuquuqda shaqaalaha socdaalka ah, iyo dib-u-dhexgelin bulsho oo waxtar leh. Socdaalka shaqadu wuxuu sii ahaan doonaa il muhiim ah oo kobcinaysa dhaqaalaha, bulshada, iyo fursadaha nolosha ee shacabka Soomaaliyeed.

**Prof. Salim Alio Ibro**
**Wasiirka Shaqada iyo Arrimaha Bulshada**
**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**

January 2026



# Dulmar kooban oo ku saabsan hirgelinta siyaasaddan

siyaasaddan ayaa bixinaysa jihayn istiraatijiyadeed oo lagu maamulayo socdaalka shaqada ee Soomaaliya, iyadoo la higsanayo in la sameeyo nidaam ilaalinaya awoodna u siinaya shaqaalaha socdaalka ah, taasoo sare u qaadaysa kaalintooda ku aadan horumarka qaranka Soomaaliya. Siyaasaddani waxay, sidoo kale, hagaysaa dadaallada lagu doonayo in lagu beddelo muuqaalka shaqada ee Soomaaliya, oo ay ku jirto kor u qaadista aqoonta iyo xirfadaha bulshada si loo kordhiyo faa'iidooyinka fursadaha shaqo ee gudaha iyo dibadda, loona waafajiyo himilooyinka guud ee horumarinta dalka.

## Himillooyinka

In la helo Hannaan socdaal shaqo mideysan oo waara, kaasoo tixgelinaya kala duwanaanshaha labada jinsi kuna saleysan xuquuqaha shaqaalaha si loogu horumariyo Qaranka.

## Hiigsiga

Dhisidda hannaan dhammeystiran oo caddaalad ku dhisan, kaasoo fududeeya badqabka iyo amaanka socdaalka shaqada.

## Ujeeddada

Ujeeddada siyaasaddani waa Sare u qaadidda faa'idooyinka si loo horumariyo nolosha shaqaalaha socdaalka gudaha iyo dibadda.

## Qiyamka Aasaasiga ah iyo Mabaadi'da Hageysa Siyaasaddan

Siyaasaddan waxay ku saleysan tahay qiyam iyo mabaadi' ay ka mid yihiin:

1. Maamul-wanaagga iyo dhawrista sharciga.
2. Shaqo wanaagsan, oo ay ka mid tahay: badqabka iyo daryeelka shaqaalaha ee goobaha shaqada.
3. Awoodsiin, ka qeybgalka, iyo sinnaanta.
4. Ilaalinta bulshada, cadaaladda iyo wada xaajood bulsho.
5. Hufnaan iyo isla-xisaabtan.
6. Horumar waara.

## Ujeeddooyinka Istiraatijiyadeed ee Siyaasaddan

Ujeeddooyinka muhiimka ah ee siyaasaddan waa:

1. Xoojinta maamul wanaagga socdaalka shaqada iyadoo la waafajinayo hal-beegyada iyo xeerarka caalamiga ah ee shaqada.
2. Horumarinta, tayeynta iyo aqoonsiga xirfadaha.
3. Ballaarinta ilaalinta iyo xuquuqda shaqaalaha socdaalaya iyo qoysaskooda.
4. Xoojinta doorka la hawl galeyaasha bulshada, bahwadaagta horumarineed, iyo qeybaha ganacsiga gaarka ah.
5. Xoojinta xog ururinta, maareynta, iyo faafinta xogta la xiriirta socdaalka shaqada.
6. Nidaaminta wakaaladaha Shaqosiinta ee gaarka ah.

7. Taageeridda nidaamyada dib u soo celinta iyo dib u dhexgalka shaqaalaha dibadda ka soo laabta.
8. Horumarinta waxtarka Jaaliyadaha Soomaaliyeed ee qurbaha.

### Mowduucyo is Dhexgala (Cross Cutting Themes)

1. Si loo xaqiijiyo dhaqangal dhammeystiran oo tixgelinaya kala duwanaanshaha jinsiga, iyadoo la raacayo hababka ugu wanaagsan ee caalamiga ah, Dawladdu waxay wax ka qabanaysaa arrimaha bulshada iyo dhaqaalaha.
2. U hoggaansanaanta sinnaanta jinsiga.
3. Ka qeybgalka iyo xaqiijinta xuquuqda dadka naafada ah.
4. Yareynta nuglaanta bulshada.
5. Iskaashi caalami ah iyo taageerada Qunsuliyadaha.
6. Wada shaqeynta Dawladda iyo Shirkadaha Gaarka ah
7. Nabadaynta iyo xallinta khilaafaadka Isbeddelka cimillada, faafitaanka cudurrada saf marka ah iyo arrimaha dabiiciga ah ee sababa guuritaan qasabka ah iyo barakaca.

## Fal gelidda siyaasadda iyo tallaabooyinka la soo jeediyey

fal-gelidda siyaasadeed ee ugu weyn ee lagu hirgelinayo siyaasaddan laguna gaarayo ujeeddooyinkeeda waa:

### Qeybta 1: Xoojinta Maamulka Socdaalka Shaqada

Tallaabooyinka ugu weyn ee qeybtan siyaasadeed waa:

1. Xoojinta Habka Iskuduwidda Qaranka ee hoos yimaada Xafiiska Ra'isul Wasaaraha si loo hagaajiyo isku xirka Hay'adaha muhiimka u ah fulinta siyaasadda (laga bilaabo heer Federaal ilaa heer Dawlad goboleed).
2. Bilowga, gorgortanka, xoojinta, iyo dib u eegista Heshiisyada Socdaalka Shaqada ee Labo geesoodka ah iyo kuwa Caalamiga ah (BLMAs & MLMAs), iyadoo la hormarinayo waddamada ay shaqaalaha Soomaalida ugu badan ku sugan yihiin.
3. Ansixinta, Meelmarinta, hirgelinta, iyo dabagalka hirgelinta heerarka shaqo ee caalamiga ah (heshiisyada, xeerarka, iyo ballan qaadyada la xiriira socdaalka shaqada).

### Qeybta 2: Horumarinta, Tayeynta iyo Aqoonsiga Xirfadaha

Tallaabooyinka ugu weyn ee qeybtan siyaasadeed waa:

1. Dhisidda Nidaamka Qaranka ee Qiimeynta Xirfadaha (National Skills Profiling Mechanism) si loo taageero baahiyaha suuqa shaqada iyo horumarinta xirfadaha ee Soomaaliya, Hirgelinta barnaamijyada Socdaalka Xirfadaha (Labour Mobility Schemes), oo diiradda saaraysa iskaashiga xirfadaha si kor loogu qaado horumarka xirfadeed ee kobaca Soomaaliya.
2. Maalgelinta barnaamijyo kor loogu qaadayo xirfadaha iyo dib u tababaridda shaqaalaha socdaalaya ee gudaha iyo dibadda.
3. In la sameeyo shabakado iyo goobo shaqo baahin oo heer kasta oo Dawladeed, kuwaasoo xayeysiiya fursadaha shaqo iyo xirfadaha u baahan in la isku xiro, loo shaqeeyeyaasha iyo kuwa shaqo doonka ah ee jooga gudaha iyo dibadda Soomaaliya.
4. Kobcinta barnaamijyada isweydaarsiga aqoonta iyo xirfadaha ee shaqaalaha socdaalaya gudaha iyo dibadda.
5. Horumarinta nidaamyada taageeraya helitaanka macluumaadka, waxbarashada, tababarka, aqoonsiga xirfadaha, iyo helitaanka maalgelinta shaqaalaha socdaalaya iyo qoysaskooda.

## Qeybta 3: Ballaarinta Illaalinta Shaqaalaha iyo Daryeelka Bulshada ee Shaqaalaha Socdaalaya iyo Qoysaskooda

Tallaabooyinka ugu weyn ee qeybtan siyaasadeed waa:

1. Dib u eegista siyaasadaha, shuruucda, iyo barnaamijyada daryeelka bulshada si loogu daro shaqaalaha socdaalaya iyadoo lagu saleynayo mabda'a sinnaanta xuquuqda.
2. Xoojinta awoodda Hay'adaha iyadoo la sameynayo Mas'uuliyiinta Xiriirka ee illaalinta bulshada iyo xuquuqda shaqaalaha socdaalaya ee Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada (MoLSA) iyo Hay'adaha la xiriira. Sidoo kale, waxaa la dhisayaa Guddi saddex-geesood ah (tripartite committee) oo horumarinaya aqoonta gudaha ee daryeelka bulshada ee shaqaalaha socdaalaya iyadoo lala kaashanayo la-hawl-galeyaasha bulsheed ee dawliga iyo kuwa maxalliga.
3. Sameynta heshiisyo Shaqo oo labo-geesood ah (BLAs) oo ay ku jiraan qodobbo daryeelka bulshada, iyo/ama heshiisyada daryeelka bulshada oo dhinacyo badan leh, si loo hubiyo qaadista iyo wanaajinta dheefaha ama faa'iidooyinka.
4. Taageeridda hirgelinta Xeerarka Suuqa Wadajirka ah ee Bulshada Bariga Afrika (EAC Common Market) ee 2023, si loo hagaajiyo iskuduwidda xuquuqda iyo faa'iidooyinka bulshada.

## Qeybta 4: Siyaasadda Xoojinta Doorka La hawl galayaasha Bulshada, Bahwadaagta Horumarineed iyo Qeybaha Ganacsiga Gaarka Ah

Tallaabooyinka ugu weyn ee qeybtan siyaasadeed waa:

1. Kor u qaadidda awoodda la hawl galayaasha bulshada si ay uga qeyb-qaataan wadahadalka bulshada ee la xiriira socdaalka shaqada.
2. Taageeridda la hawlgalayaasha bulshada iyadoo la bixinayo macluumaad iyo barnaamijyo awood-siineed si ay shaqaalaha socdaalaya uga caawiyaan abaabulkooda iyo u doodista xuquuqdooda.
3. Taageeridda doorka la hawlgalayaasha bulshada ee ku aaddan difaacidda xuquuqda shaqaalaha socdaalaya, helitaanka cadaalad.
4. Xoojinta iskaashiga Dawladda, daneeyeyaasha horumarka iyo qeybaha gaarka loo leeyahay.

## Qeybta 5: Xoojinta Xog ururinta, Maareynta, iyo Faafinta Xogta La Xiriirta Socdaalka Shaqada

Tallaabooyinka ugu weyn ee qeybtan siyaasadeed waa:

1. Dhiirri-gelinta in lagu daro arrimaha socdaalka shaqada ee nidaamka macluumaadka suuqa shaqada (Labour Market Information System - LMIS).
2. Sameynta Qaabdhismeedka xog-ururinta ee la xiriita socdaalka shaqaalaha, si joogto ahna loogu warbixiyo dhaq dhaqaaqa shaqaalaha socdaalaya iyo sifooyinkooda, iyadoo la raacayo talooyinka Shirweynaha Caalamiga ah ee Xog-ururinta Shaqada (ICLS).
3. In sahanno xilliyeed loo sameeyo xoogga shaqada, oo ay ku jiraan qeybo gaar ah oo ku saabsan socdaalka shaqada, si loo bixiyo xogta socdaalka shaqada iyo maamulka qurba joogta, iyadoo la raacayo talooyinka Shirka Caalamiga ah ee Tirokoobka Shaqada.
4. Kor u qaadidda awoodda Dawladda iyo qaabdhismeedyadeeda si loo soo ururiyo, loo falanqeeyo, loona faafiyo xogta la xiriirta socdaalka shaqada, iyadoo la hubinayo kala soocidda xogta sida jinsiga iyo sifooyinka kale ee la xiriira, xaqiijinta in xogta la heli karo guud ahaan Dawladda iyo dadweynaha (si ay uga faa'iidaystaan warbaahinta, jaamacadaha, ururrada bulshada, daneeyeyaasha horumarka, iyo Hay'adaha kale ee aan Dawliga ahayn).

## Qeybta 6: Nidaaminta Skirkadaha Shaqosiinta ee Gaarka ah

Tallaabooyinka ugu weyn ee qeybtan siyaasadeed waa:

1. Dejinta qaabdhismeedka sharciga, siyaasadda iyo habraacyada shirkadaha shaqosiinta gaarka ah.
2. Dhaqangelinta habraacyada habaynta iyo dabagalka shirkadaha shaqosiinta ee gaarka ah.
3. Dhisidda barnaamijyo dhisaya awoodda shirkadaha shaqosiinta gaarka ah si loo xaqiijiyo shaqaaleysiin caddaalad ah, iyo xoojinta awooddooda si ay u hirgeliyaan habab la jaanqaadaya sinnaanta jinsiga dhammaan nidaamyada socdaalka shaqada, laga bilaabo hawlaha dhoofitaanka ka hor ee shaqaalaha (pre-departure processes) Tababarka, Imaanshaha dalka shaqada, qorshaha dib u noqoshada iyo dib u dhexgelinta shaqaalaha.
4. Nidaaminta habdhaqanka shirkadaha shaqosiinta iyadoo la sameynayo hagayaal sharci oo si siman loo fulin karo.

## Qeybta 7: Taageeridda Nidaamyada Dib u soo celinta iyo Dib u dhexgelinta Shaqaalaha Socdaalaya

Tallaabooyinka ugu weyn ee qeybtan siyaasadeed waa:

1. Taageeridda Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada (MoLSA) si ay u saadaaliso uguna diyaar garowdo soo laabashada shaqaalaha socdaalka ah. Waxaa la dhisayaa hannaan lagu bixiyo macluumaad, tababar, iyo kaalmo sharci (ama talo sharci) si dib u soo noqdeyaashu ugu dhex milmaan dalka, iyadoo la kaashanayo shirkadaha shaqosiinta ee gaarka ah iyo xarumaha waxbarashada farsamada iyo xirfadaha (TVET).
2. Taageeridda dadaallada ay sameynayaan Hay'adaha dhex dhexaadiyeyaasha maaliyadeed si ay u bixiyaan adeegyada maaliyadeed (tusaale, xisaabaadka kuwa aan deganeyn dalka) si looga hortago khasaaraha maaliyadeed ee shaqaalaha socdaalaya iyo in la hubiyo xorriyadooda maaliyadeed.
3. Fududeynta nidaamyada xawilaadaha iyadoo la adkaynayo Qaabdhismeedka la xiriira wareejinta xuquuqda daryeelka bulshada.
4. Xoojinta nidaamka dib u mideynta qoysaska iyo carruurta shaqaalaha socdaalaya ee dalka dib ugu soo laabanaya, iyadoo la dhexgelinayo nidaamka waxbarashada iyo tababarka xirfadaha ee dalka. Dhisidda hannaan dabagal deg deg ah oo awood u leh in lagu soo gudbiyo cabashooyinka lana bixiyo magdhaw si loo hubiyo in caqabadaha soo ifbaxa inta lagu jiro kalaguurka shaqaalaha laga soo celinayo ilaa ay si buuxda u dhexgalaan bulshadooda.

## Qeybta 8: Horumarinta Waxtarka Jaaliyadaha Soomaaliyeed ee Qurba joogta Ah

Tallaabooyinka ugu weyn ee qeybtan siyaasadeed waa:

1. Dhisidda iyo xoojinta adeegyada Qunsuliyadaha iyo u-qeybsanayaasha shaqada (oo ay ku jiraan hababka cabashooyinka iyo wax ka qabashadooda) ee safaaradaha, Ergooyinka, iyo qunsuliyadaha dibadda si loo sameeyo sahanno dhammeystiran oo la xirira xaaladda jaaliyadaha Soomaaliyeed (marka la eego tirada, goobta, xirfadaha, jinsiga, iyo adeegyada loo baahan yahay).
2. Taageeridda shaqada shabakadaha iyo ururrrada jaaliyadaha dibadda si ay uga qeyb qaataan taageeridda shaqaalaha socdaalaya.
3. Dhisidda iyo dardargelinta xarunta iskuxirka jaaliyadaha Soomaaliyeed.
4. Kor u qaadidda wacyigelinta dadweynaha iyo siyaasad dejiyeyaasha ee ku aaddan ka qeyb qaadashada horumarka Qaranka.

## Hannaanka Fulinta Siyaasaddan

1. Xukuumaddu waxay xoojinaysaa habka Iskudubbaridka Socdaalka Qaranka. Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha oo hoggaaminaya hay'adaha fulinta ayaa kormeeraya meelmarinta siyaasaddan, iyadoo lala kaashanayo Golaha Wasiirrada iyo Baarlamaanka.

2. Hannaanka Iskuduwidda Qaranku wuxuu taageero ka helayaa Guddiga Isku dubbaridka Socdaalka Shaqaalaha, oo ay ku jiraan Wasaaradaha iyo Hay'adaha xirirka la leh, oo ay horjooge ka tahay Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada. Xafiiska Madaxweynaha wuxuu isuduwayaa una qareemayaa fulinta siyaasadaan, waxaana matalaya Ergeyga Gaarka ah oo u xilsaaran Arrimaha Socdaalka, Shaqaalaha Dib u soo laabanaya iyo Xuquuqda Caruurta. Guddigan Iskudubbaridku waxay bixinayaan siyaasad iyo hagitaan istaraatijiyadeed oo ku saabsan arrimaha socdaalka shaqaalaha wuxuuna ka shaqeynayaa hirgelinta qaraarrada la xiriira siyaasaddan.

3. Si loo ogeysiiyo tallaabooyinka siyaasadda, Wasaaradda waxay xoojinaysaa Xarunta Qaranka ee Kheyraadka Dijitaalka Socdaalka si loo ururiyo xog muhiim ah oo la xiriirta isbeddellada socdaalka shaqada. Wasaarradda oo adeegsanaysa madal la hawlgaleyaasha bulshada, waxay la shaqeynaysaa ururrada shaqaalaha iyo shaqo bixiyeyaasha, oo ay ka mid yihiin Ururka Shaqaalaha Soomaaliyeed, Rugta Ganacsiga Soomaaliyeed, Jaaliyadaha Dibadda, daneeyeyaasha horumarka iyo Hay'adaha aan Dawliga ahayn, si loo dardargeliyo hirgelinta siyaasaddan.

4. Heer Dawlad goboleed, siyaasaddan waxaa laga hirgelinayaa dhammaan gobollada dalka iyadoo ay hoggaaminayaan Agaasimeyaasha Guud, oo ay hoos yimaadaan Saraakiisha Shaqada ee Wasaaradaha Shaqada oo ka hawlgalaya Waax Shaqo oo si buuxda loo asaasay. Shaqaalaha socdaalaya ee gudaha iyo dibadda waxay noqonayaan kuwa ugu faa'iidada badan, iyadoo la hubinayo in siyaasaddan ay kor u qaaddo fursadaha ay ka helayaan socdaalka shaqada.

## Fursadaha Maalgelinta

Iyadoo laga duulayo caqabadaha maaliyadeed iyo kheyraadka xaddidan ee dalka, Dawladdu waxay adeegsanaysaa habab kala duwan oo lagu maalgelinayo hirgelinta siyaasaddan, kuwaasoo kala ah:

1. Miisaaniyadda loo qoondeeyey Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dawladeed ee ka timaadda miisaaniyadda Qaranka.
2. Taageero laga helo daneeyeyaasha horumarka iyo Hay'adaha Caalamiga ah.
3. Kheyraadka laga soo ururiyo gudaha dalka iyadoo loo marayo ilo dakhli oo aan cashuur ahayn.
4. Maalgelin laga helo iskaashiga Dawladda iyo Shirkadaha Gaarka ah.
5. Deymo iyo deeqo oo ay ku jiraan deymaha fudud ee Dawladda ay codsan karto si loo fuliyo mashaariic muhiim ah.
6. Isticmaalka sanduuqa Saamiyada gaarka loo leeyahay iyo xirmooyinka maaliyadeed ee hay'adaha maaliyadeed.
7. Ilaha maalgelineed ee kale (oo ay ku jiraan maaliyadda cimillada) iyo dhaqaale ururinta Jaaliyadaha Soomaaliyeed ee Dibadda.

## Gaarsiinta Iyo Faafinta Siyaasaddan

Siyaasaddan waxaa la gaarsiinayaa qeybaha kala duwan ee bulshada iyadoo la adeegsanayo habab kala duwan oo isgaarsiineed si loo waafajiyo baahiyahooda gaarka ah.

## Gaarsiinta Xukuumadda Iyo Hay'adaha Kale ee Dawladda

Waxaa dib u eegis loogu sameynayaa habraac la mid ah habraacii lagu ansixiyey, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ee Dawladda. Nuqulka siyaasaddan oo kooban ayaa loo gudbinayaa dhammaan Wasaaradaha iyo Waaxyaha Dawladda, heer federaal, heer Dawlad Goboleed iyo dhammaan hay'adaha ay khuseyso, iyadoo lala kaashanayo Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada.

## Gaarsiinta La Hawlgalayaasha Bulshada

Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada oo matalaysa dhinaca Dawladda ee Qaabdhismeedka saddex geesoodka waxay saaaasaysaa xiriiro shabakado, wada hadallo bulsho, shirar, aqoonisweydaarsiyo, wargelin warbaahineed iyo Wargeysyo, si loo gaarsiiyo siyaasaddan la hawlgalayaasha bulshada.

## Gaarsiinta Shaqaalaha Socdaalaya (Gudaha iyo Dibadda)

Si loo xariiriyo shaqaalaha socdaalka ee dibadda u baxaya, Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada waxay sameynaysaa dadaallo kala duwan oo isgaarsiineed, kuwaasoo ay ka mid yihiin barnaamijyo laga siidaayo idaacadaha, telefishinnada, shirar, kulammo bulshada lala yeesho, iyo isdhexgal fogaan arag ah oo lala yeesho muwaadiniinta Soomaaliyeed ee qurbaha ku nool, baraha bulshada, iyo mareegyadeeda ee is dhexgalka leh.

Dhanka shaqaalaha socdaalka ee gudaha soo galaya, farriimo si gaar ah loogu talagalay ayaa la diyaarinayaa si ay u daboolaan baahidooda xogeed, kuwaasoo ay ka mid yihiin siyaasaddan, siyaasado la xiriira, nidaamyada sharci, iyo adeegyada ay Dawladda u fidinayso.

Ururka Shaqaalaha Soomaaliyeed wuxuu adeegsanayaa xaruntiisa la xiriirta socdaalka iyo habab kale si uu siyaasaddan ugu faafiyo daneeyeyaasha ay khuseyso.

## Gaarsiinta Dawladaha Dalalka Martida Loo Yahay

Dawladdu waxay adeegsanaysaa safaaradaha, xarumaha diblomaasiyadeed, iyo qunsuliyadaha dibadda si ay ula xiriirto Dawladaha dalalka ay shaqaalaha Soomaaliyeed u socdaalaan ama ka shaqeeyaan. Sidoo kale Dawladda waxay ka faa'iidaysanaysaa teknoolojiyadda casriga ah iyo aaladaha isgaarsiinta si loo hagaajiyo hufnaanta isgaarsiinta iyo gudbinta macluumaadka muhiimka ah ee la xiriira shaqaalaha socdaalka ah.

# Kormeerka Iyo Qiimeynta Siyaasadda

Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada ayaa hoggaaminaysa kormeerka joogtada ah ee hirgelinta siyaasaddan, waxayna mas'uul ka noqonaysaa qiimeynteeda. Wasaaraddu waxay natiijada dib u eegista iyo qiimeynta siyaasadda u gudbinaysaa Guddiga Iskuduwidda Qaranka, waxayna warbixino iyo talooyin cusub u gudbinaysaa Wasaaradda Qorsheynta iyo Xafiiska Tirokoobka Qaranka.

Dhammaan hawlwadeennada fulinta waxaa looga baahnaanayaa inay la socdaan dhaq dhaqaaqyada sida ku qeexan siyaasaddan oo ay soo gudbiyaan warbixin sannadeedka horumarka. Sahan asaasi ah ayaa la sameynayaa sanadka ugu horeeya ee dhaqangelinta siyaasaddan si loo ururiyo macluumaadka iyo xogta heerka bilowga ah ee socdaalka shaqada, kaasoo lagu go'aaminayo ujeeddooyinkan siyaasadeed:

1. Dib u eegis sannadeed oo ku saabsan waxqabadka ayaa la sameynayaa si loo cabiro horumarka.
2. Dib u eegis dhex dhexaad ah ayaa la sameynayaa si loo qiimeeyo waxqabadka siyaasadda.
3. Dib u eegis lagu sameeyo qaabdhismeedka fulinta siyaasadda ayaa la soo jeedinayaa Dhammaadka muddada hirgelinta siyaasadda.
4. Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada ayaa loo xilsaarayaa sameynta qiimeynta ugu dambeysa, taasoo gacan ka geysanaysaa dejinta siyaasadda soo socoto ka dib 10 (toban) sano oo fulin ah.

# ▶ Soo gaabin erayo iyo waxay u taagan yihiin

| ERAYGA GAABSAN | MACNAHA UU U TAAGAN YAHAY |
|---|---|
| AU | Midowga Afrika (African Union) |
| BLA | Heshiiska Labo geesoodka ah ee Shaqada (Bilateral Labour Agreement) |
| BLMAs | Heshiisyada Labo geesoodka ah ee Socdaalka Shaqada (Bilateral Labour Migration Agreements) |
| BRMM | Maareynta Wanaagsan ee Socdaalka Gobol (Better Regional Migration Management) |
| CERD | Guddiga Ciribtirka Midab takoorka (Committee on the Elimination of Racial Discrimination) |
| COMESA | Suuqa Wadajirka ah ee Bariga iyo Koonfurta Afrika (Common Market for East and Southern Africa) |
| CSOs | Ururrada Bulshada Rayidka ah (Civil Society Organizations) |
| DACs | Bulshooyinka Saameynta Ka Soo Gaartay Barakaca (Displacement Affected Communities) |
| DTM | Habka Dabagalka Barakaca (Displacement Tracking Matrix) |
| DWCP | Barnaamijka Shaqo Wanaagsan ee Dalalka (Decent Work Country Programme) |
| EAC | Bulshada Bariga Afrika (East African Community) |
| EASO | Xafiiska Taageerada Magangelyo-doonka ee Yurub (European Asylum Support Office) |
| ESCWA | Guddiga Dhaqaalaha iyo Bulshada ee Galbeedka Aasiya (Economic and Social Commission for Western Asia) |
| EU | Midowga Yurub (European Union) |
| FCDO | Xafiiska Arrimaha Dibadda, Barwaaqo sooranka iyo Horumarinta (Foreign Commonwealth and Development Office) |
| FDI | Maal-gashiga Shisheeye ee  Gudaha (Foreign Domestic Investment) |
| FESTU | Ururka Shaqaalaha Soomaaliyeed (Federation of Somali Trade Unions) |
| FMPT | Dhaq dhaqaaqa Xorta ah ee Dadka iyo Xoolaha (Free Movement of Persons and Transhumance) |
| FMS | Sahanka Dabagalka Socodka (Flow Monitoring Survey) |
| FRS | Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (Federal Republic of Somalia) |
| GCM | Heshiiska Caalamiga ah ee Socdaalka (Global Compact for Migration) |
| GCR | Heshiiska Caalamiga ah ee Qaxootiga (Global Compact on Refugees) |
| GDP | Wax soo saarka Guud ee Dalka (Gross Domestic Product) |
| GIZ | Wakaaladda Jarmalka ee Horumarinta Caalamiga ah (German International Cooperation - Gesellschaft für Internationale Zusammenarbeit) |
| HIV | Fayraska Dilaaga ah ee Difaaca Jirka (Human Immunodeficiency Virus) |
| ICLS | Shirweynaha Caalamiga ah ee Xog-ururinta Shaqada (International Conference of Labour Statisticians) |
| IDPs | Dadka Gudaha Ku Barakacay (Internally Displaced Persons) |
| IEC | Xoggaha, Waxbarasho iyo Wacyi-gelin (Information, Education and Communication) |
| IGAD | Urur Goboleedka Horumarinta ee IGAD (Intergovernmental Authority on Development) |
| ILO | Ururka Shaqaalaha Caalamiga ah (International Labour Organization) |

| | |
|---|---|
| **IOM** | Hay'adda Caalamiga ah ee Socdaalka (International Organization for Migration) |
| **KPIs** | Calaamadaha Lagu Qiimeeyo Waxqabadka (Key Performance Indicators) |
| **LMIS** | Nidaamka Macluumaadka Suuqa Shaqada (Labour Market Information System) |
| **M&E** | Kormeerka iyo Qiimeynta (Monitoring and Evaluation) |
| **MDAs** | Wasaaradaha, Waaxyaha iyo Hay'adaha Dawladda (Ministries, Departments and Agencies) |
| **MoJCA** | Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka (Ministry of Justice and Constitutional Affairs) |
| **MoLSA** | Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada (Ministry of Labour and Social Affairs) |
| **MPO** | Falanqaynta Dhaqaalaha iyo Saboolnimada (Macro Poverty Outlook) |
| **MWSS** | Nidaamka Taageerada Shaqaalaha Socdaalaya (Migration Worker Support System) |
| **NBS** | Hay'adda Istaatitikada  Qaranka (National Bureau of Statistics) |
| **NCM** | Hannaanka Iskuduwidda Qaranka ee Socdaalka (National Coordination Mechanism) |
| **NDP** | Qorsheha Horumarinta Qaranka (National Development Plan) |
| **NGOs** | Ururrada Aan Dawliga Ahayn (Non-Governmental Organizations) |
| **NLFS** | Sahanka Shaqada Qaranka (National Labour Force Survey) |
| **ODA** | Taageerada Horumarka Dibadda (Overseas Development Assistance) |
| **PPP** | Iskaashiga Dawladda iyo Shirkadaha Gaarka loo Leeyahay (Public-Private Partnerships) |
| **PrEAs** | Shirkadaha  Shaqaaleysiint Gaarka loo Leeyahay (Private Recruitment and Employment Agencies) |
| **PRMN** | Shabakadda Ilaalinta iyo Daba-galka Dib-u-soo-celinta (Protection and Return Monitoring Network) |
| **PWD** | Dadka Naafada Ah (Persons with Disabilities) |
| **ReDSS** | Xohaynta Xarunta Xalalka Waara ee Gobolka (Regional Durable Solutions Secretariat) |
| **SCCI** | Rugta Ganacsiga iyo Warshadaha Soomaaliyeed (Somalia Chamber of Commerce and Industry) |
| **SDGs** | Yoolalka Horumarka Waara (Sustainable Development Goals) |
| **SNDP** | Qorsheha Horumarinta Qaranka ee Soomaaliya (Somalia's National Development Plan) |
| **SOM** | Soomaaliya (Somalia) |
| **STEM** | Saynis, Tiknoolaji, Injineernimo iyo Xisaab (Science, Technology, Engineering and Mathematics) |
| **SWOT** | Xoogagga, Daciifnimada, Fursadaha, iyo Caqabadaha (Strengths, Weaknesses, Opportunities and Threats) |
| **TVETs** | Xarumaha Tababarka Farsamada iyo Xirfadaha (Technical, Vocational Education and Training Institutions) |
| **TWG** | Kooxda Farsamada ee Shaqada (Technical Working Group) |
| **UN** | Qaramada Midoobay (United Nations) |
| **UNDP** | Barnaamijka Horumarinta ee Qaramada Midoobay (United Nations Development Programme) |
| **UNHCR** | Xafiiska Qaramada Midoobay ee Qaxootiga (United Nations High Commissioner for Refugees) |
| **UNOCHA** | Xafiiska Qaramada Midoobay ee Isku-dubbaridka Gargaarka Bani'aadamnimo (United Nations Office for the Coordination of Humanitarian Affairs) |
| **USD** | Doollarka Mareykanka (United States Dollars) |

# 1

# Hordhac iyo falanqayn xaaladeed

Siyaasaddani waxay Dawladda iyo bulshada siinaysaa jihayn istaraatijiyadeed oo dhammeystiran oo ku aaddan maamulka socdaalka shaqada ee gudaha iyo dibadda Soomaaliya, Waxay ku saleysan tahay hab xasaasi ah oo ku saleysan sinnaanta jinsiga iyo ilaalinta xuquuqaha si loo xaqiijiyo qaab badbaado leh, nidaamsan oo joogto ah oo loogu talagalay socdaalka shaqada ee dalka.

Siyaasaddan waxaa sidoo kale loo dejiyey inay hagto faragelinta loogu talagalay in lagu taageero isbeddelka muuqaalka shaqada ee Soomaaliya, taasoo ay ku jirto kor u qaadidda xirfadaha shaqo ee bulshada si loo wanaajiyo fursadaha shaqo ee gudaha iyo dibadda.

## 1.1. Xogta Dadweynaha, Dhaqaalaha iyo Xaaladda Shaqooyinka

Waxaa la qiyaasayaa in tirada guud ee shacabka Soomaaliyeed ay gaartay 20 milyan, iyadoo dhaqaalaha dalka uu ku tiirsan yahay adeegyada (gaar ahaan ganacsiga), beeraleyda iyo kalluumeysiga. Qeybta ugu badan ee bulshada waxay ka shaqeysaa Beeraha iyo xoolaha nool, iyadoo beeraha ay ka qeyb qaataan 80.3% GDP-ga guud ee dalka.

Sanadkii 2023, GDP-ga Soomaaliya wuxuu ahaa $10.42 bilyan, halka dakhliga qofkiiba uu ahaa $592 sanadkii. Kobaca dhaqaalaha dalka wuxuu u dhexeeyey 2-3% muddadii u dhaxaysay 2019-2023, waxaana la saadaalinayaa inuu kor u kaco ilaa 3.1% sanadka 2025, taasoo ka sarreynaysa heerka kororka dadka oo lagu qiyaasay 2.92%.

In kasta oo la saadaalinayo koror dhaqaale, haddana dalka wuxuu wajahayaa caqabado waaweyn oo ay ka mid yihiin soo xareynta dakhliga gudaha oo hooseeya iyo heerka faqriga oo sarreeya, taasoo ka sii dhigtay amni darro joogto ah. Sidaas darteed, dadaallada lagu soo jiidanayo maalgashiga tooska ah ee shisheeye iyo dhiirrigelinta ganacsiga gaarka loo leeyahay waxay muhiim u yihiin horumarka dhaqaale ee dalka, abuurista fursado shaqo, iyo dhimista heerka faqriga ee haatan jira.

## 1.2. Muuqaalka Shaqada iyo Baahida Kor u qaadista Xirfadaha Si Tartiib Tartiiib Ah

Dhallinyarada Soomaaliya waxay haystaan fursad weyn oo lagu horumarin karo dhaqaalaha dalka. Si kastaba ha ahaatee, shaqo la'aanta dhallinyarada, gaar ahaan kuwa wax bartay, waxay weli tahay caqabad weyn. Dhallinyarada leh xirfado qiimo leh ayaa inta badan u hayaama dibadda iyagoo raadinaya fursado shaqo oo ka wanaagsan.

Sanadkii 2021, heerka wax aqriska iyo qoraalka Soomaaliya wuxuu ahaa 41.03%. Heerka ka qeybgalka xoogga shaqaalaha ee qeybta rasmiga ah wuxuu ahaa 15.9% sanadkii 2022, halka heerka guud ee shaqo la'aantu uu gaaray 19.3%, iyadoo heerka shaqo la'aanta dhallinyarada gaar ahaan uu aad u sarreeyey, oo gaaray 34.6%.

Dadka Soomaaliyeed intooda badan waxay ka shaqeeyaan qeybaha (sector-ka) adeegyada, gaar ahaan: Ganacsiga (tafaariiqda iyo jumlada) – 48% Beeraha iyo dhirta – 24% Shaqooyinka guryaha iyo adeegga gudaha – 17% Dhismayaasha, martigelinta iyo adeegyada hoteellada – 11%. Sida lagu sheegay warbixinta IOM Shaxda Dabagalka Barakaca ee 2023, 59% haweenka iyo 18% ragga ah ee shaqaalaha socdaalka ah ee ka shaqeeya dibadda waxay sheegeen inaysan haysan wax shahaado waxbarasho ah. Warbixinta DTM waxay ku salaysnayd xog laga qaaday 1,628 qof, oo ay ka mid ahaayeen 926 rag ah iyo 702 dumar ah.

Sida warbixinta lagu sheegay: Keliya 8.2% dadka la wareystay waxay dhammeeyeen heer jaamacadeed (7.4%) ama waxbarasho farsamo (0.8%). Keliya 0.5% ayaa haystay shahaado tababar shaqo. Laga soo bilaabo 2021, keliya 8.2% shaqaalaha socdaalka Soomaaliyeed waxay ka shaqeynayeen qeybaha shaqooyinka Heshiiska Adeegyada Xirfadeed.

Iyadoo la eegayo heerka hadda ee xirfadaha iyo tababarrada, Dawladda waxay u jeedaa inay dejiso jihada siyaasadeed ee xaqiijinaysa xuquuqaha shaqaalaha socdaalaya gudaha iyo dibadda, iyadoo abuuraysa jawi shaqo sharfan oo nidaamsan, taasoo gacan ka geysanaysa kobcinta shakhsiyaadka iyo horumarinta qaranka.

## 1.3. Muuqaalka Socdaalka Soomaaliya

Soomaaliya waa dal socdaal badan leh oo ah dal laga tahriibo, loo tahriibo, oo marin u ah socdaalka ka gudba Geeska Afrika iyo meelo kale. Dalka wuxuu wajahaya caqabado la xiriira abuurista shaqooyin iyo fursado ku filan, iyadoo heerka shaqo la'aantu uu gaarayo 19.29%.

Faqriga iyo Saboolnimadu waxay si baahsan ugu fidsan yihiin bulshada, iyadoo in ka badan 60% dadweynaha ay ku nool yihiin wax ka yar $1.90 maalintii. Heerka wax aqriska iyo qoraalka ee Soomaaliya wuxuu taagan yahay 41.03%.

Ka qeybgalka Suuqa Shaqada waxaa jira farqi weyn oo u dhexeeya jinsiga marka la eego ka qeybgalka shaqada. 33% ragga iyo 12% dumarka ayaa si firfircoon uga shaqeeya suuqa shaqada. Dawladda Soomaaliya, iyadoo loo marayo Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada (MoLSA), waxay la shaqeynaysaa bahwadaagta horumarineed si loo dhiso Hay'ado adag oo tayo leh.

Soomaaliya waxay leedahay dhallinyaro, taasoo awood u leh inay horseedaan koboc dhaqaale. Si kastaba ha ahaatee, shaqo la'aanta dhallinyarada ayaa weli caqabad weyn ah, gaar ahaan kuwa wax bartay. Shakhsiyaadka leh xirfado qiimo leh ayaa aad ugu dhow inay ka hayaamaan dalka iyagoo raadinaya fursado shaqo oo wanaagsan.

### 1.3.1. Qaxootiga iyo Magangelyo doonka

Sida laga soo xigtay xogta Hay'adda Qaramada Midoobay u qaabilsan qaxootiga (UNHCR), laga soo bilaabo Abriil 2023, waxaa jiray 685,198 qaxooti Soomaali ah, oo u badan dalalka deriska ah, oo ay ugu horreyso Kenya (301,526) iyo Itoobiya (253,616). Sannadkii 2020, Soomaaliya waxay martigelisay 35,461 qaxooti iyo magangelyo doon ah oo u diiwaangashan, badina waxay ka yimaadeen Itoobiya (23,701). Soomaaliya waxaa kale oo ay leedahay jaaliyado aad u badan oo qurbo joog ah, oo lagu qiyaaso 1-1.5 milyan oo qof, oo ay ugu horreeyaan Boqortooyada Midowday (UK), Netherlands, Norway, Sweden, Mareykanka, Canada, iyo Australia (FMPT, 2022).

### 1.3.2. Socdaalka Soogalootiga

Socdaalka gudaha wuxuu ka kooban yahay dadka gudaha ku barakacay iyo qaxootiga. Warbixinta Shabakadda Ilaalinta iyo Dabagalka Soo noqoshada ee UNHCR (PRMN) waxay sheegtay in sannadkii 2023 ay jireen in ka badan 1.2 milyan oo qof oo cusub oo gudaha ku barakacay. Warbixinta IOM Shaxda Dabagalka Barakaca (Displacement Tracking Matrix (DTM) ee 2021 ee Soomaaliya waxay muujisay in ay jireen 121,671 qof oo dalka soo galay, kuwaasoo intooda badan ka yimid Itoobiya (66%), Kenya (13%), iyo Jabuuti (10%).

Sannadkii 2020, waxaa Soomaaliya ka baxay 159,812 qof, iyagoo aaday badankooda Itoobiya (46%), Sucuudiga (23%), Yemen (15%), Kenya (11%), iyo Jabuuti (6%).

Sida laga soo xigtay Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada (MoLSA), muddo 2 (labo) sanno ah waxaa Soomaaliya lagu bixiyey qiyaastii 15,000 rukhsado shaqo, kuwaasoo intooda badan la siiyey muwaadiniinta Uganda, Kenya, Hindiya, Boqortooyada Midowday (UK), Pakistan, iyo Bangladesh.

Sida lagu xusay Warbixinta Horumarka Aadanaha ee Iskudhafan (Integral Human Development Report 2024) oo ay WSHAB (MoLSA) wax ka diyaarisay, inta badan shaqaalaha ajaanibta ah ee yimaad Soomaaliya waxay ka shaqeeyaan jagooyinka kala ah Lataliye iyo shaqaalaha ka tirsan Hay'adaha caalamiga ah ee aan Dawliga ahayn (NGOs) iyo ururrada bulshada rayidka (CSOs), Shaqaale dhanka amniga ah, Shaqaalaha dhismaha. Tuubooleyda iyo farsamo yaqaannada gaarka ah (inta badan heshiisyo kooban), Shaqaalaha ka hawlgala hoteellada, hawlaha bini'aadannimada iyo waaxda martigelinta. Si kastaba ha ahaatee, ma

jiro xog qeexan oo muujinaysa sida loo kala qeybiyey shaqaalaha ajaanibta ee haysta rukhsadaha shaqo, taasoo sabab u ah qaabdhismeed iyo nidaamyo la'aan lagu dabagalo xogtooda.

### 1.3.3. Socdaalka Shaqaalaha Dibadda

Waddooyinka ugu badan ee ay shaqaalaha socdaalka Soomaaliyeed u maraan dibadda waa saddex waddo oo waaweyn:

1. Badda –Iyagoo ka tallaabaya badda si ay u gaaraan Yemen, ka dibna uga sii gudbaya waddamada Khaliijka. Si kastaba ha ahaatee, waddadan ayaa hoos u dhacday tan iyo 2015, sababo la xiriira dagaalka Yemen.
2. Jidka Koonfureed – Iyagoo mara Kenya, ka dibna uga sii gudbaya dhanka Koonfur Afrika.
3. Jidka Galbeed – Iyagoo mara Sudan iyo Libya, iyagoo rajeynaya inay ka tallaabaan Badda Mediterraneanka si ay u gaaraan Yurub.

Weli ma jirto xog la cusboonaysiiyey oo ku saabsan socdaalka aan sharciyeysnayn (irregular migration).

Dawladda Soomaaliya waxay dhammeystirtay Heshiiska Shaqo ee labo geesood (Bilateral Labour Agreement (BLA)) ee u dhexeeya JFS iyo Qatar, waxaa kale oo ay labo heshiis la gashay Boqortooyada Sacuudi Carabiya, kaasoo ah waddanka martigeliya inta badan shaqaalaha socdaalka Soomaaliyeed, gaar ahaan haweenka.

### 1.3.4. Ka qeybgalka Jaaliyadaha Soomaaliyeed

Soomaaliya waxay leedahay jaaliyaddo ballaaran oo ku kala firirsan daafaha caalamka, iyadoo lagu qiyaasay in ay ku nool yihiin 2 (labo) milyan oo Soomaali ah waddamada kala ah: **Boqortooyada Midowday (UK), Holland, Norway, Sweden, Mareykanka (USA), Canada, South Afrika, Australia (FMPT, 2020).**

### 1.3.5. Lacagaha ay Dibadda Ka Soo Diraan Jaaliyadaha

Socdaalka shaqaalaha iyo doorkiisa ku aaddan horumarka dhaqaale waa udub dhexaadka siyaasaddan. Jaaliyadaha Soomaaliyeed waxay door muhiim ah ka ciyaaraan horumarka Dalka, gaar ahaan marka la eego lacagaha ay dibadda ka soo diraan (remittances). Sanadihii 2023 iyo 2024, lacagaha ay jaaliyaduhu u soo direen Soomaaliya waxaa lagu qiyaasay inay u dhaxayso $1.73 bilyan ilaa $2 bilyan. Lacagtan ay dirayaan jaaliyaduhu waxay dhaaftay qiimaha guud ee dhoofinta Soomaaliya sanadkii. Waxay kaalinta labaad kaga jirtaa dhaqaalaha Soomaaliya, iyadoo ka dambeysa oo keliya Gargaarka Horumarinta Dibadda (Overseas Development Assistance - ODA), kaasoo gaaray $2.6 bilyan sanadkii 2023.

## 1.4. Qaabdhismeedka Maamulka Socdaalka Shaqada

Marka la eego heerka caalamiga ah, Soomaaliya waxay ansixisay 26 Heshiisyo Caalami ah ee ILO, 22 ka mid ah hadda waa dhaqangal. Kuwaas waxaa ka mid ah 8 (siddeed) heshiis oo aasaasi ah (C097 iyo C143). Bishii Feberaayo 2021, Wasiirka Shaqada iyo Arrimaha Bulshada ayaa ansixiyey 7 (toddobo) Heshiisyo Caalami ah oo dheeraad ah oo ILO ah isagoo ka wakiil ah Xukuumadda JFS.

Heerka Qaranka, Hannaanka Iskuduwidda Qaranka ee Socdaalka (NCM) waxaa dib loo aasaasay 2023, wuxuuna hoostagayaa Xafiiska Ra'isul Wasaaraha DFS, wuxuuna ka kooban yahay saddex guddi hoosaad oo ay ku jiraan (FESTU).

**Heer Qaran**: Hannaanka Iskuduwidda Qaranka ee Socdaalka (NCM) waxaa dib loo asaasay 2023, wuxuuna hoos imaanayaa Xafiiska Ra'isul Wasaaraha, wuxuu ka kooban yahay 3 (saddex) kooxood oo hawl fulin ah:

- **Kooxda Hawlfulinta ee Maareynta Socdaalka: waxay** Hoggaaminayaan horumarinta siyaasadaha shaqo iyo shuruucda heer qaran, si waafaqsan heerarka iyo xeerarka caalamiga ah. waxaana hoggaaminaya Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada.
- **Kooxda Farsamo ee La dagaallanka Tahriibka iyo Ka ganacsiga Dadka:** Waxaa si wadajir ah u guddoominaya Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Dib u heshiisiinta iyo Federaaleynta iyo Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka Xukuumadda JFS, waxayna taageerayaan hirgelinta siyaasadaha iyo xeerarka la xiriira socdaalka.
- **Kooxda Farsamo ee Soo celinta iyo Dib u qaadashada Shaqaalaha Soomaaliyeed ee Tahriibay:** Waxay iskudubbaridaa soo celinta iyo dib u qaadashada shaqaalaha Soomaaliyeed ee qurbaha ku nool.

Hannaanka Iskuduwidda Qaranka ee Socdaalka wuxuu bixiyaa qaabdhismeed maamul oo hagaya, wadaagaya xogta, nidaaminayaa dadaalada lagu hirgelinayo siyaasadda qaran ee socdaalka. Sanadkii 2024 Ergeyga Gaarka ah ee Xuquuqda Carruurta iyo Muhaajiriinta ee Xafiiska Madaxweynaha JFS wuxuu martigeliyey Iyadoo taageero laga helaayo UNHCR, ILO, iyo IOM, waxaana la dhisayaa Koox Farsamo oo Socdaal Iskudhafan, taasoo wax ka taraysa kooxaha heer federaal ee maareynta socdaalka.

Bishii Maarso 2024, waxaa la aasaasay Guddiga Isuduwidda Qaranka ee Socdaalka Shaqada, kaasoo hoos imaanaya Dawladda, iyadoo loo marayo Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada, oo kaashanaysa ILO iyo IOM, waxay dhisaysaa Guddigaan oo ay xubno ka yihiin hay'adaha soo socda:

1. Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada;
2. Wasaaradda Arrimaha Dibadda & IC – Waaxda Qurbo joogta;
3. Wasaaradda Qoyska iyo Horumarinta Xuquuqda Aadanaha;
4. Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Dib u heshiisiinta iyo Federaaleynta;
5. Hay’adda Socdaalka iyo Jinsiyadaha
6. Hay’adda Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranka
7. Xafiiska Tirokoobka Qaranka ee Soomaaliya;
8. Ururka Xiriirka Shaqaalaha Soomaaliyeed (FESTU); iyo
9. Rugta Ganacsiga iyo Warshadaha Soomaaliya (SCCI).

Jaantus muujinaya Qaabdhismeedka Hay'adaha iyo nidaamka maamulka socdaalka shaqada wuxuu ku xusan yahay Qeybta 4.3 & 4.4 ee dukumintigan.

Shantii sano ee la soo dhaafay, waxaa muuqday horumar dhanka wada shaqeynta ah oo u dhexeeya Dawladda iyo la hawlgalayaasha bulshada, iyadoo la adeegsanayo wadahadal saddex geesood ah. Shaqaalaha socdaalka waxay billaabeen ka qeybgalka ururrada shaqaalaha ee Soomaaliya, gaar ahaan iyadoo loo marayo Taageerada ILO, FESTU waxay horumarisay una ansixisay istiraatijiyad abaabul oo shaqaalaha socdaalka u saamaxaysa inay helaan wakiillo matala, Tani waxay u fududeysay inay si firfircoon uga qeyb qaataan shaqooyinka ay qabtaan ururrada shaqaalaha iyo arrimaha la xiriira gorgortanka wadajirka ah. Sidaas darteed, waa lama huraan ah in FESTU ay sii wado dadaalladeeda wacyigelinta iyo xoojinta shaqaalaha socdaalka, si ay u helaan xuquuqahooda, loona horumariyo xaaladooda shaqo ee u baahan fiiro gaar ah.

## Xaaladda Dhibaatada iyo Sababaha Aasaasiga ah ee Siyaasaddan

Maamulka socdaalka shaqada ee Soomaaliya wuxuu daciif ka yahay xagga iskuduwidda hay’adaha iyo maqnaanshaha nidaam xog ururin ee suuqa shaqada, taasoo caqabad ku noqotay xeernidaaminta iyo maareynta shaqaalaha socdaalka.

Sanadkaan 2025, Dawladda Soomaaliya waxay dhammeystirtay Heshiisyada Shaqaalaha Socdaalka ee ay la gashay Qatar iyo labo heshiis oo ay la saxiixatay Boqortooyada Sacuudi Carabiya oo hoy u ah bulsho weyn oo Soomaali ah. Shaqada Shirkadaha Shaqosiinta Gaarka ah ee dalka weli si wanaagsan looma nidaamin, taasoo sababtay in shaqaalaha Soomaaliyeed ee socdaalka ah ay la kulmaan dhibaatooyin la xiriira xaquuq la'aan, xaalado shaqo oo liita, iyo nuglaansho ka dhan ah tahriibinta iyo shaqada khasabka ah. Gaar ahaan, dalalka Khaliijka, oo ay ka jirto nidaamka dammaanadda shaqada (kafala system), waxaa si joogto ah loo diiwaangeliyey xadgudubyo iyo takoorid ka dhan ah shaqaalaha socdaalka, gaar ahaan haweenka inta badan ka shaqeeya guryaha. Dhibaatadan waxay sii adkeyneysaa baahida loo qabo nidaam sharci oo xaqiijinaya ilaalinta xuquuqda shaqaalaha socdaalka Soomaaliyeed.

In kasta oo Xeerka Shaqada Soomaaliya L.36 ee 2024 uu dhaqangal yahay uuna saxiixay Madaxweynaha JFS laguna soo saaray faafinta rasmiga ah, haddana dalka wuxuu weli wuxuu la tacaalayaa soo saarista Xeernidaamiyeyaasha lagu dhaqangelinaayo xeerkaas, Sharciga Shaqo qorista Shaqaalaha Ajnabiga ah L.10 ee 2015 oo nidaamiya socdaalka shaqaalaha ee imaanaya Soomaaliya ma lahan habraacyo dhammeystiran oo ilaaliya shaqaalaha socdaalka, wuxuuna si kooban uga hadlayaa keliya shuruudaha iyo hannaanka lagu helo rukhsadda shaqo ee shaqaalaha ajnabiga ah ee dalka yimaada. Taageero dheeraad ah ayaa looga baahan yahay la hawlgalayaasha bulshada si ay kor ugu qaadaan awoodooda ayna u habeeyaan shaqaalaha oo ay u matalaan loo shaqeeyeyaasha, oo ay ku jirto ka qeyb qaadashada wax ku oolka ah ee dadaalka gorgortanka wadajirka ah.

Arrimahan, iyo kuwo kale ayaa dammaanad qaaday baahi deg deg ah oo loo qabo aasaaska siyaasaddan qaran ee socdaalka shaqada.

## 1.5. Sababaha Aasaasiga ah ee Siyaasadda

Maqnaanshaha siyaasadda iyo qaabdhismeedka sharci ee u dhigma, shaqaalaha soogalootiga ah waxay sii wadayaan inay la kulmaan xadgudubyada xuquuqda, dhiig miirashada, iyo baylahda la xiriirta jawi shaqo oo khatar ah, oo ay ku jiraan Ceymisnaanta hoose ee badbaadada shaqada iyo caafimaadka, mushaar yar, takoorid isgoysyada, shaqo mushaar yar oo aan rasmi ahayn ama ku meel gaar ah, xorriyadda xaddidan ee ururka iyo gorgortan wadajir ah, xorriyad xaddidan ee dhaq dhaqaaqa, ilaalinta xaddidan ee helitaanka. Siyaasaddan ayaa Soomaaliya u sahlaysa in ay gaarto yoolalka la higsanayo, gaar ahaan marka loo eego Himillooyinka Horumarka Waara ee (SDGs (8) iyo (10). Waxay fulinaysaa ballanqaadkii Dawladda ee ku aaddanaa Qaabdhismeedka socdaalka shaqada ee Urur Goboleedka IGAD, ballan qaadyadii ay u sameysay suuqa ganacsiga Bariga iyo Koonfurta Afrika (COMESA) iyo bulshada Bariga Afrika (EAC) iyo la jaan qaadka siyaasadda socdaalka ee Soomaaliya.

### La tacaalidda Arrimaha Jinsiga

Qaabka socdaalka shaqada iyo natiijooyinkiisa waxay si weyn ugu kala duwanaan karaan ragga iyo dumarka shaqaalaha socdaalka ah. Siyaasadaha suuqa shaqada iyo socdaalka mar walba waxay leeyihiin saameyn jinsiyeed, mana ahan kuwo dhex dhexaad ah, Siyaasaddan waxaa loo sameeyey iyadoo la tixgelinayo dhismaha nidaamyo iyo qaabdhismeedyo dabooli kara baahiyaha kala duwan ee ragga iyo dumarka, taasoo dhiirrigelinaysa fursadaha loo siman yahay. Soomaaliya gudaheeda, haweenka waxay la kulmaan caqabado badan oo aanay raggu la kulmin marka ay shaqo u socdaalaan. Tani waxay inta badan ka dhalatay aragtiyo isir jinsiyeed xagjir ah, kuwaasoo dumarka siinaya heer ka hooseeya ragga, isla markaana hoos u dhigaya qiimaha shaqadooda. Naqshadeynta siyaasadda socdaalka shaqadu waxay leedahay hab ka jawaabaya jinsiga si wax looga qabto arrimahan iyo kuwa kale.

### Ku saleysanaanta Xuquuqda

Qaabeynta siyaasadda Qaran ee socdaalka shaqaalaha waxay qaadanaysaa hab xuquuqeed si waafaqsan heerarka shaqada ee caalamiga ah, ballan qaadyada Caalamiga ah iyo mid Goboleed, iyo habka dhaqannada wanaagsan ee soo ifbaxaya, Siyaasaddan waxay xoojinaysaa socdaal shaqo oo nabdoon, nidaamsan, iyo sharciyeysan, iyadoo la xaqiijinayo ilaalinta xuquuqda shaqaalaha socdaalka, gaar ahaan haweenka oo inta badan la kulma takoorid iyo xadgudubyo la xiriira jinsiga, dadka naafada ah, si loo hubiyo in aysan la kulmin caqabado dheeraad ah marka ay shaqo raadsanayaan ama shaqo hayaan.

# 2

# Jihada istiraatijiyadda

Siyaasaddan waxay dejinaysaa jihada istiraatijiyadda ee maareynta socdaalka shaqaalaha Soomaaliya, iyadoo ujeeddadu tahay in la adkeeyo mabaadi'da ilaalinta iyo awoodsiinta shaqaalaha socdaalka ah, loona suurta geliyo ka qeybgalka ugu wanaagsan ee horumarka Qaranka.

## Aragtida

In la helo Hannaanka socdaalka shaqaalaha oo waara, iskudhafan, loo dhan yahay, kuna saleysan xuquuqda aadanaha si kor loogu qaado horumarka Qaranka.

## 2.1. Himillada

In la dhiso qaabdhismeed dhammeystiran oo caddaalad ah kaasoo fududeeya socdaal shaqo oo badbaado leh, nidaamsan oo joogto ah.

## 2.2. Ujeeddada

In la xoojiyo faa'idooyinka socdaalka shaqaalaha ee gudaha iyo dibadda si loo horumariyo nolosha shaqaalaha Soomaaliyeed iyo koboca dhaqaalaha Qaranka.

## 2.3. Qiyamka Asaasiga ah iyo Mabaadi'da Hageysa Siyaasaddan

Qiyamka iyo mabaadi’da aasaasiga ah ee siyaasaddan hagaya waa:

1. Maamul wanaagga iyo u hoggaansanaanta Sharciga hubinta hannaan ka qeyb-qaadasho oo ay hoggaaminayaan shuruuc iyo xeerar hufan, laguna hirgeliyey hannaan hay'adeed oo la iskudubbariday oo la iska kaashaday si kor loogu qaado danaha shaqaalaha socdaalaya si waafaqsan heerarka caalamiga ah.

2. Shaqo hufan Hubinta in shaqadu tahay mid wax soosaar leh, bixisa dakhli ku filan, hubinta amniga iyo xasilloonida goobaha shaqada, ilaalinta shaqaalaha iyo qoysaskooda, wanaajinta rajada is dhexgalka bulshada shakhsi ahaaneed iyo horumarinta Qaranka.

3. Xoojinta, ka mid noqoshada iyo ka qeyb galka xoojinta nidaamyada, habaynta shaqada si loo hubiyo in aan cidna ka harin, iyo ilaalinta xuquuqda shaqaalaha socdaalka ah ee nugul iyo kuwa la takooro.

4. Ilaalinta, Cadaaladda, wadatashiga Bulshada, Bixinta ilaalinta bulshada dhexdeeda iyadoo la eegayo qeybo ka mid dammaanad qaadka badbaadada bulshada ee aasaasiga ah, hubinta caddaaladda bulshada iyadoo la sameynayo nidaam ku habboon xuquuqaha loo siman yahay, iyo horumarinta wada hadal bulsho oo waara.

5. Xaqiijinta wada hadal bulsho oo waara oo ka yimaada dhanka Dawladda wada hadalkas oo ay ku jiraan dhammaan noocyada gorgortanka, wadatashiga iyo xog isweydaarsiga u dhexeeya wakiillada Dawladda, loo shaqeeyeyaasha iyo shaqaalaha kuna saabsan arrimaha danta guud ee la xiriirta siyaasadaha dhaqaalaha iyo bulshada.

6. Daah furnaanta iyo La xisaabtanka Xaqiijinta daahfurnaanta iyo isla xisaabtanka dhammaan daneeyeyaasha si loo dhiso iskaashi ku habboon oo kor loogu qaadayo kalsoonida nidaamka socdaalka shaqaalaha, Isla xisaabtanka wuxuu saameynayaa dhammaan daneeyeyaasha, kuwaasoo si joogto ah loo qiimeeyo, loo cabbiro, loona hubiyo waxqabadkooda la xiriira waajibaadkooda.

7. Horumarinta Joogtada ah Dejinta hannaan waara oo loogu talagalay socdaalka shaqalaha kaasoo tixgelinaya baahida jiilka hadda jira iyo kuwa mustaqbalka si loo gaaro yoolalka Horumarineed ee Joogtada ah.

## 2.4. Ujeeddooyinka Istaraatijiyadeed ee Siyaasaddan

Ujeeddooyinka aasaasiga ah ee siyaasaddan waa:

1. Xoojinta maamulka socdaalka shaqaalaha si waafaqsan halbeegyada iyo xeerarka caalamiga ah ee shaqada.

2. Aqoonsiga xirfadaha iyo Horumarintooda.

3. Xoojinta ilaalinta bulshada iyo dammaanadda bulsho ee shaqaalaha Socdaalka ah.

4. Xoojinta doorka la hawlgalayaasha bulshada.

5. Xoojinta soo saarista, maareynta iyo faafinta xogta la xiriirta socdaalka shaqaalaha.

6. Nidaaminta shirkadaha shasiinta ee gaarka loo leeyahay.

7. Dhisidda iyo taageeridda nidaamyada lagu maareeyo soo noqoshada iyo dib u milanka shaqaalaha socdaalka ah.

8. Horumarinta waxtarka jaaliyadaha qurbaha.

## 2.5. Mowduucyada Is dhexgala

Dawladdu, iyadoo qeyb ka ah hirgelinta siyaasaddan, waxay wax ka qabanaysaa arrimaha is dhexgala leh si loo hubiyo in fulinta siyaasadda ay noqoto mid loo dhan yahay, u janjeera sinnaanta jinsiga, laguna waafajiyo habdhaqannada caalamiga ah ee ugu wanaagsan:

1. **Arrimaha Dhaqaalaha iyo Bulshada**– Sida lagu xusay qorshaha Horumarinta Qaranka ee Soomaaliya, wax ka qabashada arrimaha socdaalka shaqaalaha waxay noqonaysaa qeyb ka mid ah dadaallada ballaaran ee lagu yareynayo saboolnimada, sinnaan la'aanta dakhliga, iyo helitaanka adeegyada aasaasiga ah ee dadka nugul. Waxaa la tixgelinayaa caqabadaha ay ka mid yihiin waxbarasho la'aanta, ku tiirsanaanta, iyo caqabadaha kale ee ka hor istaagaya helitaanka adeegyada bulshada.

2. **Ka jawaabista aragtida kala duwanaanshaha jinsiga iyo Sinaanta**– Haweenka iyo carruurta ayaa si xad dhaaf ah u saameeyey caqabadaha la xiriira socdaalka shaqaalaha. Si wax looga qabto arrintan, Dawladda waxay hirgelinaysaa tallaabooyin lagu ilaalinayo shaqaalaha socdaalka ah, gaar ahaan haweenka ka shaqeeya shaqooyinka guryaha iyo daryeelka. Waxaa la xakameynayaa takooridda ku saleysan midabka, jinsiga, doorashada, (guurka) aqoonsiga jinsiga, luqadda, diinta, aragtida siyaasadeed, dhalashada, asalka qowmiyadeed ama bulsho, xaaladda maskaxeed, da'da, ama cudurka HIV, si waafaqsan Xeerka Shaqada Soomaaliya L.36 2024

3. **Ka qeyb galka Dadka Naafada ah-** Dadka naafada ah waxay la kulmaan takoor iyo caqabado la xiriira socdaalka shaqaalaha. Dawladda, oo si buuxda u ogsoon xaqiiqada waxay xoojinaysaa dadaallada lagu ilaalinayo xuquuqda dadka naafada ah. Waxaa la hirgelinayaa tallaabooyin gaar ah oo suurtagal ka dhigaya in ay si buuxda uga qeyb galaan suuqa shaqada ee Soomaaliya iyo dibadda.

4. **Yareynta Nuglaanshaha-** Dawladdu waxay hirgelinaysaa tallaabooyin lagu yareynayo nuglaanta shaqaalaha socdaalka ah, iyadoo la hubinayo in heshiisyada shaqo ee labada dal (BLAs) ay si cad u

qeexayaan xuquuqda shaqaalaha, dammaanad bulsho, magdhaw shaqo, iyo ka qeybgalka ururrada shaqaalaha si ay u helaan xuquuqdooda shaqo iyo awoodda go'aan qaadashada shaqo.

5. **Iskaashiga Caalamiga ah iyo Taageerada Qunsuliyadaha-** Dawladdu waxay xoojinaysaa iskaashiga caalamiga ah iyo wada shaqeynta si loo hirgeliyo siyaasaddan si hufan. Waxaa la adeegsanayaa habab kala duwan oo lagu maareeyo socdaalka shaqaalaha, oo ay ka mid yihiin iskaashi goboleed, qaaradeed iyo caalami ah, si loo xaqiijiyo in shaqaalaha socdaalka ah ay helaan adeegyada qunsuliyadeed ee tayada sare leh, oo ay ku jiraan caawinta habraacyada fiisaha iyo adeegyada kale ee lagama maarmaanka ah. Si arrintan loo xaqiijiyo, Dawladda waxay u diraysaa ku-qeybsanaha, xiriiriyeyaasha shaqaalaha waddamada ay shaqaalaha Soomaalida u badan yihiin si loo ilaaliyo xuquuqdooda.

6. **Iskaashiga Dawladaha iyo Ganacsiga Gaarka loo leeyahay-** Dawladdu waxay si dhow ula shaqeynaysaa shirkadaha shaqosiinta gaarka ah si loo hirgeliyo siyaasaddan, iyadoo la aqoonsanayo doorkooda muhiimka ah ee dhiirrigelinta socdaal shaqo oo badbaado leh, nidaamsan oo joogto ah. Iskaashigan wuxuu xaqiijinayaa in baahiyaha iyo aragtiyada shaqaalaha iyo loo shaqeeyeyaasha lagula xisaabtamo inta lagu guda jiro hirgelinta siyaasadda. Hindisayaal muhiim ah waxaa ka mid noqonaysaa horumarinta xirfadaha iyo abuurista fursado shaqo iyadoo la dhiirrigelinayo ganacsiyada shaqaalaha qaxootiga ah.

7. **Nabadda iyo Xallinta Khilaafaadka-** Dawladdu waxay garwaaqsan tahay in nabadda iyo ammaanku ay lagama maarmaan u yihiin abuurista jawi shaqo oo xasilloon. Sidaas darteed, Dawladda waxay sii wadaysaa dadaallada lagu hirgelinayo hannaanka xallinta khilaafaadka si kor loogu qaado maalgashiga, abuurista shaqo, iyo horumarka dhaqaale. Waxaa sidoo kale la hirgelinayaa istiraatijiyado horumarineed oo lagu dhiirrigelinayo horumarinta miyiga, dhismaha nabadda, wacyigelinta bulshada iyo kor u qaadista isku duubnida bulshada Soomaaliyeed.

8. **Isbeddelka Cimilada iyo Masiibooyinka Dabiiciga ah-** Isbeddelka cimilada, cudurrada faafa iyo masiibooyinka dabiiciga ah waxay si weyn u saameeyeen Soomaaliya, iyadoo 31% dadka Soomaaliyeed ay ku khasbanaadeen inay ka hayaamaan guryahooda sababo la xiriira abaaro iyo fatahaado daran. Si wax looga qabto arrintan, Dawladdu waxay xoojinaysaa nidaamyada digniinta deg degga ah (early-warning systems) si bulshada looga ilaaliyo saameynta masiibooyinka. Siyaasaddan waxaa la fulinayaa iyadoo lala kaashanayo waaxyaha kale si loo ilaaliyo, loo xajiyo, loona dhawro degaanka.

9. **Dijitaalaynta (Casriyeenta)-** Soomaaliya waxay ka faa'iidaysanaysaa dijitaalaynta si loo horumariyo socdaalka shaqaalaha ee badqabka nidaamsan leh ee joogtada ah, iyadoo la aqoonsanayo hufnaanta iyo hal abuurka ay teknolojiyaddu u keenayso dunida shaqada.

# 3

# Tallaabooyinka, farogelinada iyo hababka siyaasaddan

Si loo hirgeliyo siyaasaddan, loogana miro dhaliyo ujeeddooyinkeeda, waxaa la qaadayaa faragelintaan, hababkan iyo tallaabooyinka aasaasiga ah ee soo socoda**:**

## Qeybta 1: Xoojinta Maamulka Socdaalka Shaqada si waafaqsan halbeegyada iyo Xeerarka Caalamiga ah ee Shaqada

Tallaabooyinka muhiimka ah ee qeybtan waa:

1. Xoojinta Hannaanka Iskuduwidda Qaran ee hoos yimaada xafiiska Ra'isul Wasaaraha DFS si la isku xiro shaqada hay'adaha muhiimka ah ee ku hawlan hirgelinta siyaasadda socdaalka, lana gaarsiiyo Dawlad goboleedyada xubnaha ka ah Federaalka.

2. Bilaabidda, dib u eegidda iyo xoojinta heshiisyada labo geesoodka iyo kuwa dhinacyada badan ee socdaalka shaqaalaha (BLMAs iyo MLMAs), si gaar ah wadamada ay joogaan shaqaalaha Soomaaliyeed ee tiro badan. Waxaa sidoo kale la xaqiijinayaa ansixinta, hirgelinta, iyo dabagalka fulinta heerarka shaqaalaha ee caalamiga ah, oo ay ka mid yihiin xeerarka, heshiisyada iyo ballanqaadyada la xiriira socdaalka shaqaalaha.

## Qeybta 2: Aqoonsiga Xirfadaha iyo Horumarintooda

Tallaabooyinka muhiimka ah ee qeybtan waa:

1. Dhisidda hannaan Qaran oo lagu qiimeeyo xirfadaha iyo qorsheynta shaqo.

2. Abaabulka iyo hirgelinta barnaamijyo lagu xoojinayo nidaamyada dhaq dhaqaaqa shaqaalaha, iyadoo diiradda la saarayo iskaashiga xirfadaha si loo daboolo baahida suuqa shaqada ee Soomaaliya iyo kobcinta xirfadaha.

3. Maalgelinta barnaamijyada kobcinta xirfadaha oo ay ku jiraan xirfado cusub, sare u qaadidda xirfadaha iyo dib u tababaridda shaqaalaha gudaha iyo dibadda ka shaqeeya.
4. Hirgelinta shabakado iyo goobo shaqo baahin ee heer kasta oo Dawladeed kuwaasoo xayeysiiya fursadaha shaqo iyo xirfadaha u baahan in la isku xiro loo shaqeeyeyaasha iyo kuwa shaqo doonka ah ee jooga gudaha iyo dibadda.
5. Dhiirrigelinta isweydaarsiga aqoonta iyo xirfadaha ee shaqaalaha gudaha iyo kuwa dibadda.
6. Horumarinta habab taageero oo lagu xoojinayo helitaanka macluumaadka, waxbarashada, tababarada, aqoonsiga xirfadaha iyo maalgelinta shaqaalaha socdaalka ah iyo qoysaskooda.

## Qeybta 3: Ballaarinta Ilaalinta Shaqada iyo Dammaanadda Bulsho ee Shaqaalaha Socdaalka iyo Qoysaskooda

Tallaabooyinka muhiimka ah ee qeybtan waa:

1. Dib u eegista siyaasadaha, shuruucda, iyo nidaamyada dammaanadda bulshada si ay u daboosho shaqaalaha socdaalka iyadoo lagu saleynayo mabda'a sinnaanta xuquuqda shaqaalaha.
2. Xoojinta awoodda hay'adaha iyadoo la dejinayo xafiisyo gooni u ah arrimaha ilaalinta bulshada iyo shaqaalaha socdaalka, lana dhisayo guddi saddex geesood ah si loo horumariyo aqoonta maxalliga ah ee ilaalinta shaqaalaha iyo dammaanadda bulsho.
3. Hirgelinta heshiisyada labo geesoodka ah ee shaqaalaha oo ay ku jiraan dammaanado bulsho, ama heshiisyada ammaanka bulsho ee heer caalami si loo xaqiijiyo wareejinta iyo isticmaalka faa'iidooyinka.

4. Taageeridda hirgelinta xeernidaamiyeyaasha Suuqa Wadajirka ah ee Bariga Afrika (EAC Common Market regulations – 2023) ee iskudubbaridka xuquuqaha iyo faa'iidooyinka dammaanadda bulsho.

## Qeybta 4: Xoojinta Doorka La hawlgalayaasha Bulshada, hawlgalayaasha Horumarinta, iyo Qeybaha Gaarka Loo Leeyahay

Tallaabooyinka muhiimka ah ee qeybtan waa:

1. Dhisidda awoodda ururrada shaqaalaha iyo daneeyeyaasha bulshada si ay uga qeyb qaataan wadahadalka la xiriira socdaalka shaqaalaha.
2. Taageeridda ururrada shaqaalaha iyadoo la bixinayo macluumaad iyo dadaallo awoodsiineed, si shaqaalaha socdaalka ah ay isugu abaabulaan una difaacdaan xuquuqdooda.
3. Taageeridda ururrada shaqaalaha si ay ugu doodayaan xuquuqda shaqaalaha socdaalka ah iyo helitaanka caddaaladda.
4. Xoojinta iskaashiga u dhexeeya Dawladda, daneeyeyaasha horumarineed, iyo ganacsiga gaarka loo leeyahay, si loo abuuro jawi shaqo oo hufan, badbaado leh, laguna kalsoonaan karo.

## Qeybta 5: Xoojinta Soo saarista, Maareynta, iyo Faafinta Xogta Socdaalka Shaqaalaha

Tallaabooyinka muhiimka ah ee qeybtan waa:

1. Ku dhex daridda qeybta socdaalka shaqaalaha nidaamka macluumaadka suuqa shaqada.
2. Dhisidda qaabdhismeedka tirokoobyada socdaalka shaqaalaha, kaasoo suurtagal ka dhigaya dabagal joogto ah oo lagu sameeyo dhaq dhaqaaqa shaqaalaha socdaalka ah iyo astaamahooda, lana waafajinayo talooyinka Shirweynaha Caalamiga ah ee Tirokoobyada Shaqada.
3. Daraasado joogto ah oo lagu sameeyo suuqa shaqada, iyadoo lagu darayo cutubyo khaas ah oo la xiriira xogta socdaalka shaqaalaha iyo maareynta jaaliyadda qurbaha, lana waafajinayo talooyinka (International Conference of Labour Statisticians ICLS). Waxaa la dhisayaa awoodda Dawladdu si ay si hufan u ururiso, u falanqeyso, uguna faafiso xogta socdaalka shaqaalaha, iyadoo la hubinayo in xogtaas lagu kala saaro jinsiga iyo astaamo kale oo muhiim ah. Waxaa la xaqiijinayaa in xogta si joogto ah loo faafiyo lana xoojiyo helitaankeeda dhammaan waaxyaha Dawladda iyo dadweynaha (warbaahinta, jaamacadaha, bulshada rayidka, daneeyeyaasha horumarineed iyo dhinacyada kale ee aan Dawliga ahayn).

## Qeybta 6: Nidaaminta Shirkadaha Shaqosiinta Gaarka ah

Tallaabooyinka muhiimka ah ee qeybtan waa:

1. Dhisidda qaab sharci iyo xeerar nidaaminaya Shirkaddaha shaqosiinta gaarka ah.
2. Hirgelinta xeerar iyo hagitaan lagu nidaaminayo la socodka iyo maareynta xarumaha shaqosiinta gaarka ah.
3. Dhisidda barnaamijyo kobcinta awoodda xarumaha shaqosiinta si loo hubiyo inay si hufan u shaqeeyaan, loona sugo in shaqaaleysiinta ay noqoto mid cadaalad ah. Barnaamijkan wuxuu xoojinayaa awoodda xarumaha si loo hubiyo in habraacyo u janjeera sinnaanta jinsiga lagu daro dhammaan marxaladaha socdaalka shaqaalaha, oo ay ku jiraan Ka hor bixitaanka Tababarka shaqaalaha, Imaanshaha waddanka loo socda Xaaladda shaqo ee waddanka loo tegay, Soo noqoshada iyo dib u milanka shaqaalaha.

4. Nidaamin sharci oo la xakameynayo habdhaqanka Shirkadaha shaqosiinta, iyadoo la dejinayo hagitaanno sharciyeed oo labada dhinacba (Dawladda iyo shirkadaha shaqosiinta) si siman u fulin karaan.

## Qeybta 7: Taageeridda Nidaamyada Soo noqoshada iyo Dib u milanka Shaqaalaha Socdaalka

Tallaabooyinka muhiimka ah ee qeybtan waa:

1. Taageeridda Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada (MoLSA) si ay hore ugu sii qorsheyso soo noqoshada shaqaalaha socdaalka, iyadoo la dhisayo hannaan bixiya macluumaad, tababar iyo caawinaad sharci ama talo bixin ah, si shaqaalaha soo laabanaya dib ugu milmaan bulshada. Tani waxaa ka mid ah taageerada ay ka heli karaan shirkadaha shaqqosiinta gaarka ah iyo machadyada TVETka.
2. Xoojinta dadaallada ay wadaan hay'adaha maaliyadeed si loo fududeeyo bixinta adeegyada maaliyadeed ee shaqaalaha socdaalka ah, sida xisaabaadka maaliyadeed ee dadka aan dalka joogin (non-resident accounts), taasoo qeyb ka ah dadaallada looga hortagayo khasaaraha maaliyadeed iyo xaqiijinta xorriyadda maaliyadeed ee shaqaalaha socdaalka ah.
3. Hirgelinta nidaam fududeeya wareejinta lacagaha xawaaladaha iyadoo la xoojinayo qaabdhismeedka wareejinta faa'iidooyinka ilaalinta bulshada.
4. Fududeynta mideynta qoysaska iyo kor u qaadista is dhexgalka carruurta shaqaalaha soo laabanaya, iyadoo lagu darayo nidaamka waxbarashada Qaranka iyo tababarrada xirfadeed. Waxaa la dhisayaa nidaam dabagal iyo cabashooyinka lagu xalliyo si dhibaatooyinka ka dhasha kalaguurka laga soo bilaabo soo noqoshada ilaa dib u milanka loo xalliyo si deg deg ah.

## Qeybta 8: Kordhinta iyo Hagaajinta Ka qeybgalka Jaaliyadaha Soomaaliyeed ee Qurbaha

Tallaabooyinka muhiimka ah ee qeybtan waa:

1. Dhisidda iyo xoojinta adeegyada qunsuliyadaha iyo xiriiriyeyaasha shaqaalaha ee safaaradaha, qunsuliyadaha, iyo xafiisyada diblomaasiyadda ee dibadda. Waxaa lagu darayaa habab cabasho iyo xal u helid si loo sameeyo tirokoob joogto ah (diaspora mapping) oo lagu ogaanayo tirada, goobaha ay joogaan, xirfadahooda, jinsigooda, iyo adeegyada ay u baahan yihiin.
2. Taageeridda hawlaha ay wadaan shabakadaha iyo ururrada jaaliyadda Soomaaliyeed si ay gacan uga geystaan difaacidda xuquuqda shaqaalaha socdaalka ah iyo taageeridda ka qeybgalka bulshada.
3. Dhisidda xarun isku xirta jaaliyadda Soomaaliyeed ee qurbaha taasoo fududeynaysa wada shaqeynta iyo iskaashiga jaaliyadda iyo Dawladda.
4. Wacyigelinta guud ee bulshada iyo siyaasiyiinta ee la xiriirta doorka muhiimka ah ee jaaliyadda Soomaaliyeed ay ka ciyaaraan horumarka qaranka, si loo kordhiyo aqoonsiga iyo taageerada loo fidiyo.

# 4

# Qaabdhismeedka hirgelinta siyaasaddan

Soomaaliya waxay qaadanaysaa hab **"Dawlad iyo bulsho wadajir ah"** si loo xaqiijiyo in hirgelinta siyaasaddan ay noqoto mid dhammaan bulshada ka faa'iidaysato, loona hubiyo in cidna laga tagin. Dawladdu waxay dhisaysaa qaabdhismeed maareynta socdaalka shaqaalaha oo dhammeystiran, iyadoo xoojinaysa awoodda hay'adaha u xilsaaran fulinta, iskuxirka, iyo iskaashiga daneeyeyaasha muhiimka ah.

Hannaankani wuxuu ka koobnaanayaa Dhisidda qaab sharci iyo xeernidaamiyeyaalka socdaalka shaqaalaha, hagaajinta xiriirka hay'adaha Dawliga ah ee ka shaqeeya hirgelinta siyaasadda iyo abuurista hannaan isku xiraya hay'adaha fulinta si loo hubiyo wada shaqeyn hufan oo waafaqsan qaabdhismeedka Soomaaliya ee socdaalka shaqaalaha, xeerar Goboleedka iyo kuwa Caalamiga ahba.

## 4.1. Qaabdhismeedka Sharciyada iyo Xeerarka

### Qaabdhismeedka Qaranka

Sharciyada, siyaasadaha, istiraatijiyadaha, iyo qorsheyaasha Qaran ee qaabaynaya macnaha guud ee siyaasaddan waa:

### Dastuurka Ku meel gaarka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (2012)

Dastuurka Qaranka wuxuu qeexayaa dhawr qodob oo muhiim ah oo la xiriira siyaasaddan:

1. Qodobka 24 – Wuxuu xaqiijinayaa in dhammaan shaqaaluhu ay leeyihiin xuquuqda xiriirka shaqo ee cadaaladda ku dhisan. faqradda 5aad wuxuu si gaar ah u xusayaa in "dhammaan shaqaalaha, gaar

ahaan haweenka, ay leeyihiin xuquuq gaar ah oo lagu ilaalinayo ku xadgudubka galmada, takoorka, iyo caddaalad darro shaqo."

2. Sharci kasta oo la xiriira shaqada iyo dhaqankeeda waa in uu kor u qaadaa sinnaanta jinsiga ee goobaha shaqada. Muwaadiniintu waa xor inay sameystaan ururro siyaasadeed ama kuwa aan siyaasadeed ahayn. Waxay sidoo kale leeyihiin xuquuqda dhaq dhaqaaqa dalka gudihiisa, xorriyadda ka bixidda dalka iyo soo noqoshada, iyo xaqa ay u leeyihiin inay helaan baasaboor u oggolaanaya in ay safraan. Dhammaan muwaadiniinta Soomaaliyeed waxay xor u yihiin in ay doortaan xirfadda ay doonayaan oo ay si xalaal ah ugu shaqeystaan.

## Siyaasadda Qaranka ee Shaqosiinta (NEP) iyo Qorshaha Qaranka ee (2019)

Siyaasaddan waxaa lagu hirgelinayaa iyadoo la kaashanayo qodobbada muhiimka ah ee ku xusan **Siyaasadda Qaranka ee Shaqosiinta,** gaar ahaan kor u qaadista shaqo abuurka iyadoo lala kaashanayo wadahadalka Dawladda iyo shirkadaha gaarka ah. Hirgelinta siyaasad canshuur iyo ganacsi oo dhiirrigelisa koboca fursadaha shaqo. xoojinta arrimaha is dhexgalka bulshada, oo ay ka mid yihiin xuquuqda shaqaalaha carruurta, saameynta isbeddelka cimilada, da'yarta, haweenka, iyo kooxaha kale ee nugul, iyo wax ka qabashada kala duwanaanshaha magaalooyinka iyo miyiga.

## Qorshaha Horumarinta Qaranka 2020–2024

Iyadoo la raacayo qorshahan, siyaasaddan waxay mudnaan siinaysaa:

1. Abuurista shaqo iyo horumarinta xirfadaha shaqaalaha.
2. Xoojinta wax soo saarka dhaqaalaha, oo ay ka mid yihiin beeraha, xoolaha, iyo kalluumeysiga.
3. Hirgelinta qorshayaal lagu xallinayo khilaafaadka soo noq noqda.
4. Dadaallada wax looga qabanayo saameynta taban ee isbeddelka cimilada, taasoo saameyn weyn ku leh socdaalka shaqaalaha.

## Xeerka Shaqada Soomaaliya ee Dhaqangalka ah

Siyaasaddan waxay la jaanqaadaysaa Xeerka Shaqada Soomaaliya, iyadoo xoogga la saarayo qodobadan muhiimka ah:

1. **Qodobka 60 (2)** – haddii ay dhacaan xaaladaha noocaas oo kale ah ee uu Shaqaalaha xuquuqdiisa waayo, qofka shaqaalaha ahi wuxuu xaqiisaasi toos ah uu ugu yeelanayaa qandaraaslaha.
2. **Qodobka 59 (2)** – marka uu jiro heshiis qoraal ah oo u dhexeeya qandaraas hoosaad qaataha iyo qandaraas bixiye kasta qandaraas bixiyaha waxaa waajib ku ah inuu labo nuqul oo qandaraaska ah u gudbiyo sarkaalka shaqada ee awoodda u leh, isagoo tilmaamaya meesha ay ku taal goobta shaqada laga fulinaayo.
3. **Qodobka 48 (b)** – Loo shaqeeyaha waxaa waajib ku ah inuu bixiyo ujuurada lagu heshiiyay, isaga oo raacaya shuruudihii, goortii, iyo meeshii la isku raacay bixinta ujuurada sida heshiiska ku cad ee waafaqsan xeerkaan, xeernidaamiyeyaashiisa ama heshiisyo wadareedkii jiray.
4. **Qodobka 93** – Loo shaqeeyaha ayaa laga doonayaa inuu ku wargeliyo Agaasimaha markii jago ka banaanaato shirkadiisa ama goobtiisa shaqo.

## Siyaasadda Qaranka ee Qurbo joogta (2023)

In kasta oo barnaamijyo kala duwan oo jaaliyadda Soomaaliyeed la xiriira ay gaareen guulo waqti gaaban ah iyo maalgelin la heli karo, saameyntooda horumarineed wali waa mid xaddidan. Sida lagu xusay siyaasaddan, tani waxay ka dhalatay “la’aanta awoodda lagu qaabeeyo lana hirgeliyo faragelin wax ku ool ah oo ballaaran.” Siyaasaddan waxay ka faa'iidaysanaysaa qodobbada muhiimka ah ee lagu xusay Siyaasadda. Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga ah ayaa hormuud u ah hirgelinta siyaasaddan, iyadoo la kaashaneysa safaaradaha, qunsuliyadaha, iyo xafiisyada diblomaasiyadda ee Soomaaliya. Siyaasaddan waxaa si gaar ah loo aasaasay si loo fududeeyo iskaashiga lala yeesho daneeyeyaasha caalamiga ah ee la xiriira arrimaha jaaliyaddaha Soomaaliyeed. Si loo xaqiijiyo hirgelin wax ku ool ah, Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga ah waxay ka qeyb qaadanaysaa Hannaanka ama Habka Iskuduwidda Qaranka (National Coordination Mechanism). Guddiga Iskudubbaridka Socdaalka Shaqaalaha. Labadan madal waxay gacan ka geysanayaa doodaha iyo xallinta arrimaha soo kordha ee la xiriira jaaliyadaha Soomaaliyeed ee qurbaha, oo ay ku jiraan shaqaalaha Soomaaliyeed ee socdaalka ah.

## Siyaasadda Qaran ee Qaxootiga Soo noqday iyo Barakacayaasha Gudaha

Hirgelinta siyaasaddan waxay ka faa’iidaysanaysaa qodobbada muhiimka ah ee ku xusan Siyaasadda Qaran ee Qaxootiga Soo noqday iyo Barakacayaasha:

1. Ilaalinta ka dhanka ah barakaca khasabka ah.
2. Ilaalinta dadka inta ay ku jiraan xaaladda barakaca.
3. Soo noqoshada qaxootiga si mutadawacnimo ah iyo xorriyadda doorashada xal waara.

4. Xuquuqda dhaq dhaqaaqa xorta ah iyo doorashada goobta deegaamaynta.
5. Xuquuqda nolol ku filan oo waafaqsan heerarka aadanaha.
6. Xuquuqda dadka naafada ah si loo sugo ka qeyb gal buuxa oo xuquuqdooda lagu ilaaliyo.
7. Diiwaangelinta iyo haynta dukumentiyada saxda ah ee qaxootiga soo noqday iyo barakacayaasha gudaha.
8. Ka hortagga takoorka iyo qaxootiga soo noqday iyo barakacayaasha gudaha.

## Sharciga Shaqo qorista Shaqaalaha Shisheeye (2015)

Shacriga Shaqo qorista Shaqaalaha Shisheeye ee 2015 wuxuu xeerinayaa arrimo kala duwan oo la xiriira shaqaalaha ajaaniibta oo ay ka mid yihiin:

1. Shuruudaha shaqada iyo xaaladaha ka reeban.
2. Codsiga rukhsadda dhiirrigelinta maalgashiga.
3. Degganaanshaha iyo fiisaha shaqaalaha dibadda.
4. Soo saaridda iyo ansaxnimada rukhsadaha shaqada.
5. Bixinta kordhin mushahar la xiriirta.
6. Shaqaaleysiinta, meeleynta, ama iscasilaadda shaqaalaha.
7. Dhisidda Guddiga Qiimeynta Shaqaalaha Ajaanibta.
8. Xadgudubyada xuquuqda shaqaalaha ajaaniibta.

Siyaasaddan waxay si gaar ah u dhammeystiraysaa qodobbada soo socda:

1. Qodobka 3: Xaaladaha shaqada iyo ka dhaafitaannada la xiriira.
2. Qodobka 5: Dhiirrigelinta maalgashiga iyo codsiga rukhsadaha la xiriira.
3. Qodobka 6: Degganaanshaha iyo fiisaha shaqaalaha ajaaniibta.
4. Qodobka 7: Xaaladda shaqaalaha ajaaniibta, dadka la musaafuriyey, iyo shakhsiyaadka jinsiyaddooda laga noqday; iyo sidoo kale dadka Soomaaliya ku dhashay balse aan wali helin jinsiyadda Soomaaliga ah.

## Hab-raaca Shaqosiinta Dibadda (Overseas Employment Guidelines) (2022)

Siyaasaddan waxay ku salaysan tahay dhinacyadan soo socda ee hagaya Siyaasaddan waxay ku salaysnaanaysaa qodobbada muhiimka ah ee ku jira Habraaca Iyo Adeegga Guud ee Shaqosiinta Dibadda Shaqaalaha Hagaha Shaqada Dibadda (2022) waxaa ka mid ah:

1. Xaaladaha shaqo ee dibadda iyo hubinta inay yihiin kuwo wanaagsan oo ku habboon shaqaalaha.
2. Dhawrista iyo u hoggaansanaanta heshiisyada shaqada ee shaqaalaha socdaalka ah inta ay dibadda joogaan.
3. Bixinta magdhawga shaqaalaha marka ay waxyeello gaarto ama ay khasaaro la kulmaan.
4. Shaqaaleysiinta iyo qorista shaqaalaha loo dirayo wadamada aan la lahayn heshiisyada shaqo ee labo geesoodka ah (bilateral labour migration agreements) ee Soomaaliya la leedahay.

## Heshiisyada Socdaalka Shaqaalaha ee Labo geesoodka ah

Dawladdu waxay la gelaysaa Heshiisyo Labo geesood ah oo la xiriira Socdaalka Shaqaalaha dalalka ugu waa weyn ee ay shaqaalaha Soomaaliyeed ay u socdaalayaan. Heshiisyadan waxay ujeeddoodu tahay in la dhiso nidaam is faham leh oo ku saleysan qorista, dirista, iyo dib ucelinta shaqaalaha, iyadoo lagu saleynayo sharciyada, xeerarka, iyo qawaaniinta khuseeya.

## Sharciga Maalgashiga Shisheeye 2015

Sharciga Maalgashiga Shisheeye ee 2015 wuxuu dhiirrigelinayaa horumarinta dhaqaalaha, iyadoo la hubinayo ilaalinta shaqaalaha iyo xuquuqdooda.

Qodobada muhiimka ah ee sharcigan waxaa ka mid ah:

1. Kor u qaadista maalgashiga shisheeye ee dalka si loo kobciyo dhaqaalaha.
2. Abuurista fursado shaqo oo ay ka faa'iidaystaan shaqaalaha gudaha iyo kuwa socdaalka ah.
3. Horumarinta xirfadaha shaqaalaha iyo dhiirrigelinta tababaro xirfadeed.
4. Hubinta in heerarka shaqada cadaalad yihiin, oo la ilaaliyo xuquuqda shaqaalaha.
5. Soo gelinta iyo fududeynta Isdhaafsiga Teknolojiyadda si loo horumariyo wax soo saarka.
6. Dhiirrigelinta koboc waara oo waafaqsan shuruudaha horumarineed ee dalka.
7. La jaanqaadidda baahida suuqa shaqada, iyadoo shaqaalaha loo diyaarinayo xirfado la jaanqaadi kara shaqooyinka la heli karo.
8. Taageeridda ka mid noqoshada shaqaalaha socdaalka ah ee nidaamka rasmiga ah ee shaqo

## Qaabdhismeedka iyo Heerarka Caalamiga ah Hadafyada Horumarka Waara ee Qaramada Midoobay

Hadafyada Horumarka Waara ee Qaramada Midoobay (SDGs), oo sidoo kale loo yaqaan Ajandaha 2030, waxay aqoonsan yihiin in socdaalka shaqaalaha uu yahay arrin muhiim u ah horumarka waara. Mowduuca "in cidna aan la dayicin" wuxuu muujinayaa dadaal caalami ah oo lagu hubinayo in dhammaan dadka, oo ay ku jiraan shaqaalaha qaxootiga ah, lagu daro qorsheyaal horumarineed oo waara.

Siyaasaddan waxay si gaar ah diiradda u saaraysaa hadafyada SDGs ee la xiriira socdaalka shaqaalaha, kuwaasoo kala ah:

1. Hadafka 1: Ciribtirka saboolnimada iyo hubinta in shaqaalaha qaxootiga ah ay helaan fursado dhaqaale.
2. Hadafka 5: Xaqiijinta sinnaanta jinsiga iyo awoodsiinta haweenka iyo gabdhaha shaqaalaha qaxootiga ah.
3. Hadafka 8: Kobcinta shaqo cadaalad ah, koboc dhaqaale, iyo ilaalinta xuquuqda shaqaalaha qaxootiga ah.
4. Hadafka 10: Yaraynta sinnaan la'aanta iyo hubinta in shaqaalaha socdaalka sameynaya ay helaan xuquuqdooda shaqo.
5. Hadafka 16: Xoojinta hay'adaha cadaaladda iyo dawlad wanaagga, si loo hubiyo ilaalinta xuquuqda shaqaalaha.

Si loo xaqiijiyo hirgelinta hadafyadan, Dawladda Soomaaliya waxay bilowday dadaal bishii Janaayo 2016 si ay u waafajiso hadafyadan qorsheyaasha qaran.

Si loo fududeeyo hirgelinta Ajandaha 2030 ee la xiriira siyaasaddan:

1. Dawladdu waxay xoojinaysaa isku xirka hay'adaha muhiimka ah ee ururinaya xogta la xiriirta socdaalka shaqaalaha.
2. Waxaa la xallinayaa caqabadaha ku xeeran ururinta iyo keydinta xogta, si gaar ah goobaha muhiimka ah iyo waaxyaha shaqo.
3. Waxaa la xoojinayaa awoodda Dawlad goboleedyada iyo heerka federaalka ee la xiriirta maareynta iyo falanqeynta xogta socdaalka shaqaalaha.

Siyaasaddan waxay la jaanqaadaysaa hadafyada horumarineed ee caalamiga ah, iyadoo xoojinaysa nidaamyada maareynta shaqaalaha qaxootiga ah, ilaalinta xuquuqdooda iyo kobcinta dhaqaalaha Soomaaliya.

## Hadafyada Horumarka Waara ee Qaramada Midoobay (SDGs) 2030.

Hadafyada Horumarka Waara ee Qaramada Midoobay oo sidoo kale loo yaqaan Ajandaha 2030, waxay u aqoonsan yihiin socdaalka shaqada inuu yahay arrin muhiim ah oo horumar waara. Mowduuca "in cidna aan la dayicin" waxay xoogga saaraysaa dadaal caalami ah oo hubinaya ka qeybgalka, oo ay ku jiraan socdaalka shaqo, si loo helo xal waaro. Himmillooyinka ku habboon siyaasaddan ayaa ah Yoolalka 1, 5, 8, 10, iyo 16. Si loo xaqiijiyo dhaqangelinta qorsheyaasha Qaramada Midoobay ee SDGs, Dawladda Soomaaliya ayaa bishii Janaayo 2016 bilowday dadaallo lagu xaqiijinayo hadafyadaas laguna waafajinayo qorsheyaasha qaranka. Si loo taageero geeddi socodkan, Dawladdu waxay kor u qaadaysaa iskudubbaridka xog ururinta ee ka dhexeeya daneeyeyaasha muhiimka ah, wax ka qabashada dulduleelada xogta iyo xog ururinta ee goobaha muhiimka ah iyo qeybaha muhiimka ah, xoojinta nusqaamaha, Farqi awoodeed heer federaal iyo heer Dawlad goboleed ee maamulka iyo falanqaynta xogta.

## Heshiisyada Caalamiga ah ee Ururka Shaqaalaha Adduunka (ILO) ee Socdaalka Shaqaalaha

Marka laga soo tago Heshiiska Caalamiga ah ee Shaqaalaha Socdaalka ee ILO No. 97 ee 1949 ( kaasoo tixraacaya xogta, siyaasadaha qaran, sharciyada iyo xeerarka la xiriira soogalootiga iyo socdaalka; macluumaadka ku saabsan qodobbada gaarka ah ee la xiriira shaqo doonista iyo xaaladaha shaqada iyo nolosha socdaalka shaqo doonka ah) iyo Heshiiska ILO No. 143 ee 1975 ee Shaqaalaha Socdaalka (kaasoo sheegaya in dalalka ay waajib ku tahay inay ilaaliyaan danaha shaqaalaha marka ay ka shaqeynayaan waddamo aan dalkooda ahayn), waa lama huraan in la ogaado in qaar ka mid ah heshiisyada muhiimka ah aan weli la ansixin, balse ay tahay in la tixgeliyo si kor loogu qaado maamulka socdaalka shaqaalaha ee Soomaaliya. Kuwaas waxaa ka mid ah:

1. Heshiiska Siyaasadda Shaqaalaynta No. 122 ee 1964
2. Heshiiska Shaqaalaha Guryaha No. 189 ee 2011
3. Qoritaanka Heshiiskii Shaqaalaha Wadaniga ah ee No. 50 ee 1936
4. Qandaraasyada Shaqada (Shaqaalaha asaliga ah) Heshiiska No. 64 ee 1939.
5. Hubinaya in shaqaalaha socdaalka ay helaan damaanad bulsho oo siman (Social Security) Heshiiskii No. 118 ee 1962
6. Iyadoo qeyb ka ah hirgelinta siyaasaddan, Dawladdu waxay tixraacaysaa aaladaha kale ee caalamiga ah ee ay Soomaaliya qeyb ka tahay, oo ay ku jiraan: Is afgaradka Caalamiga ah ee Badqabka, Nidaaminta iyo Socdaalka Joogtada ah.
7. Hagidda Caalamiga ah ee Heshiisyada Socdaalka Shaqada ee Labo geesoodka ah
8. Guddiga Ciribtirka Takoorka Jinsiga
9. Guddiga Ilaalinta Xuquuqda Dhammaan Shaqaalaha Socdaalka ah iyo Xubnaha qoysaskooda.

## Barnaamijka Shaqo Hufan ee Dalka (DWCP 2023-2025)

Dhaqangelinta siyaasaddan waxay la jaan qaadaysaa hawlgelinta Barnaamijka Labaad ee Shaqo Hufan ee Soomaaliya (DWCP 2023-2025). Barnaamijku wuxuu ku baaqayaa in cadeymo lagu saleeyo falanqaynta xaaladda bulsho, siyaasadeed iyo dhaqaale ee Soomaaliya. Waxay gacan ka geysataa gaaritaanka afar ujeeddooyin istiraatijiyadeed oo ILO ah: shaqosiinta, ilaalinta bulshada, wada hadalka bulshada iyo saddex geesoodka iyo mabaadi'da aasaasiga ah iyo xuquuqda shaqada.

## Qaabdhismeedka Kale ee Horumarinta Qaranka

Dhawr qaabdhismeed heer Qaran ah ayaa ku socda horumarinta oo khuseeya hirgelinta siyaasaddan:

## Qabyo qoraalka Istiraatijiyadda Socdaalka Qaranka (2024)

Dawladdu waxay hirgelinaysaa Istaraatijiyadda Socdaalka Qaranka, taas oo ujeeddadeedu tahay in lagu bixiyo hagitaan Qaran oo ku aaddan aragtida, mabaadiida iyo yoolalka socdaalka ee Soomaaliya. Aragtida istaraatijiyadu waa in la hubiyo fursadaha socdaalka joogtada ah, badbaado iyo nidaamsan, iyo sidoo kale horumarinta natiijooyinka horumarinta ee dhammaan. Siyaasaddani waxay ka soo qaadanaysaa dhinacyada soo socda ee istiraatijiyaddan: horumarinta nabadgelyada iyo is xilqaanka dib u soo celinta iyo dib u dhexgalka muhaajiriinta Soomaaliyeed, joogtaynta waddooyinka socdaalka, la dagaalanka tahriibka iyo tahriibinta dadka, ka qeyb galka qurba joogta horumar waara iyo dhimista kharashaadka xawaaladaha. Hirgelinta istiraatijiyaddan waxay hoos imaanaysaa Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada, si ay ula jaanqaado Siyaasadda Socdaalka Qaranka. Siyaasaddan ayaa ah qaabdhismeedka guud ee hagaya dhammaan arrimaha socdaalka, oo ay ku jirto socdaalka shaqaalaha.

## Qabyo qoraalka Istiraatijiyadda Xalka Waara ee Qaranka (2025-2029)

Istaraatijiyadan waxaa fulinaya Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha iyo Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Dib u heshiisiinta iyo Federaalaynta. MuddadaWasaaradahan hadda jira waxay dhamaanayaan 2024, iyadaoo qorshooyinka lagu bilaabayo hirgelinta 2025. Siyaasaddani waxay tixraacaysaa istaraatijiyada xalalka waara ee qaranka taas oo abuurtay jawi awood u leh hal abuurnimo badan iyo dadaallo saameyn leh (iyo sidoo kale Xoghaynta Xalalka Waara ee la asaasay 2019). Istaraatijiyaddu waxay ujeedadeedu tahay in lagu taageero Soomaaliya sidii loo dammaanad qaadi lahaa boos maaliyadeed iyo mid siyaasadeed, taasoo u gogol xaareysa xaqiijinta horusocod ee jawi karti leh. Degaankani wuxuu hubinayaa in bulshooyinka ay saamaysay barakaca, oo ay ku jiraan dadka gudaha ku barakacay, qaxootiga, magangalyo doonka, kuwa soo laabtay iyo bulshooyinka martida loo yahay ay helaan xalal waara.

## Qabyo qoraalka Siyaasadda Qaran ee TVET Waxbarashada Farsamada iyo Tababarka Xirfadaha)

Ujeeddooyinka ugu waaweyn ee Siyaasadda TVET ee Soomaaliya, marka loo eego socdaalka shaqaalaha, waxay diiradda saaraan xoojinta awoodda shaqaalaha si ay u daboolaan baahiyaha suuqa shaqada gudaha iyo caalamiga ah. Ujeeddooyinkan waa la kala saari karaa dhawr qodob oo muhiim ah:

1. Xoojinta Horumarinta Xirfadaha iyo Fursadaha Shaqo.

2. Hubinta Aqoonsiga Shahaadooyinka iyo Xirfadaha.

3. Taageeridda Socdaalka Ammaan oo Sharci ah.

4. Horumarinta Kobaca Dhaqaalaha Waara.

5. Xoojinta Taageerada Dib u soo noqoshada.

6. Dhiirrigelinta Sinnaanta Jinsiga.

## Qaabdhismeedyada Heer Goboleedka ah

Dhismaha siyaasadda socdaalka shaqaalaha waxaa sidoo kale laga dhaxlayaa siyaasadaha sharci iyo qaabdhismeedyada hay'adaha Goboleed ee soo socda:

1. Qaabdhismeedka Siyaasadda Socdaalka ee Midowga Afrika (MPFA) iyo Qorshaha Hawleedkeeda (2018-2030)
2. Tilmaamaha Midowga Afrika ee Dejinta Heshiisyada Labo geesoodka ee Shaqaalaha (BLAs)
3. Bayaanka Midowga Afrika ee Ilaalinta iyo Horumarinta Xuquuqda Shaqaalaha Socdaalka
4. Hannaanka Khartoum, Hindisaha Jidka Socdaalka Geeska Afrika ee Midowga Yurub (Noofembar 2014)
5. Qaabdhismeedka IGAD ee Socdaalka Shaqaalaha
6. Siyaasadda Socdaalka Shaqaalaha ee Bulshada Bariga Afrika (2024)
7. Shirwaynaha Wasiirrada Goboleedka ee Socdaalka Bariga iyo Geeska Afrika (2020)
8. Qorshaha Ka jawaabista Socdaalka ee Gobollada Geeska Afrika iyo Yemen (2022)
9. Wadahadalka Socdaalka ee COMESA (2013)

# 4.2. Hababka Dhaqangelinta Siyaasadda

Dawladdu waxay xoojinaysaa Haanaanka Iskuduwidda Qaranka (NCM) ee Socdaalka oo hoos imaanayaa Xafiiska Ra'isul Wasaaraha DFS, Guddiga Iskuxirka Shaqaalaha Socdaalka, oo ay shir guddoominayso Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada ayaa taageeraya hannaankan. Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha oo ah hoggaanka fulinta ee Dawladda ayaa kormeeraya hirgelinta siyaasaddaan, isagoo fududeynaya xiriirka Golaha Wasiirrada iyo Baarlamaanka.

Xafiiska Madaxweynaha waxaa nidaamkan ku matalaya Ergayga Gaarka ah ee Socdaalka, Soo noqoshada iyo Xuquuqda Carruurta. Guddiga Isku xirka Shaqaalaha Socdaalka wuxuu bixinayaa hagitaan siyaasadeed iyo jiheyn istaraatijiyadeed oo ku saabsan arrimaha shaqaalaha socdaalka, isagoo hagaya hirgelinta go'aannada la gaaray. Si ay u hesho xog lagu hagayo tallaabooyinka siyaasadeed, Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada (MOLSA) waxay xoojinaysaa Xarunta Qaran ee Kheyraadka Dijitaalka ee Socdaalka, si loo helo xog lagama maarmaan ah oo ku saabsan isbeddellada socdaalka shaqada.

Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada, iyadoo adeegsanaysa madal wadaaga bulshada, waxay la shaqeynaysaa ururrada shaqaalaha iyo kuwa loo shaqeeyeyaasha, oo ay ku jiraan Ururka Xiriirka Shaqaalaha Soomaaliyeed sida Rugta Ganacsiga Soomaaliyeed, jaaliyadda qurbo joogta, bahwadaagta horumarinta, iyo daneeyeyaal kale oo aan dawli ahayn, si ay u fududeeyaan hirgelinta siyaasaddan.

Heer Dawlad Goboleed, siyaasaddan waxaa laga hirgelinayaa guud ahaan dalka, waxaana taageeraya Agaasimayaasha Guud iyo saraakiisha shaqada ee ka hawlgala Waaxda Shaqada ee si buuxda loo dhisay. Dadkii ugu horreeyey ee ka faa'iideysanaya siyaasaddan waa shaqaalaha socdaalaya, kuwaasoo si wanaagsan uga faa'iideysanaya fursadaha shaqo ee socdaalka shaqada.

Dawladdu waxay horumarinaysaa nidaam wada shaqeyn iyo is dhexgal leh oo u dhexeeya hay'adaha kala duwan, si loo xaqiijiyo hirgelinta waxtarka leh ee siyaasaddan. Si loo dhiso nidaam waara oo isku dhafan oo loogu talagalay shaqaalaha socdaalaya ee Soomaaliya, Dawladdu waxay dhisaysaa hab hufan, midaysan, oo si wanaagsan loo maalgeliyey ee leh qaabdhismeed hirgelin oo cad.

## 4.3. Dhaqangeliyeyaasha Fulinta, Iskudubbaridka iyo Wada shaqeynta Hay'adaha

Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada ayaa mas'uul ka noqonaysa iskuxirka iyo wada shaqeynta Hay'adaha kala duwan, iyadoo hubinaysa in siyaasaddan si mideysan loo hirgeliyo. Wasaaradda waxay hadda martigelisaa shirarka Kooxda Farsamada ee Socdaalka Shaqaalaha. Nidaamkan wuxuu soo koobayaa ka qeyb galka daneeyeyaal aan Dawli ahayn, oo ay ka mid yihiin: ururrada shaqaalaha, ururrada loo shaqeeyeyaasha, ganacsiga gaarka loo leeyahay, jaaliyadda qurbo joogta, ururrada aan Dawliga ahayn, ururrada ku saleysan bulshada, iyo bah wadaagta horumarinta.

Natiijooyinka ka soo baxa wada hadalladan waxay hagayaan shaqada Hanaanka Iskuduwidda Qaranka (NCM), oo hoos yimaada Xafiiska Ra'isul Wasaaraha DFS si loo xaqiijiyo dabagalka guud iyo jihaynta siyaasadeed ee shaqaalaha socdaalaya.

Iyadoo qeyb ka ah maareynta socdaalka shaqaalaha, Dawladda waxay saxiixaysaa, ansixinaysaana, hirgelinaysaa, fulinaysaa, oo si joogto ah uga warbixinaysa heshiisyada caalamiga ah, aaladaha Goboleed, borotokoollada, axdiyada iyo shuruucda khuseeya shaqaalaha socdaalaya. Sidoo kale, Dawladda waxay horumarinaysaa socdaal shaqo oo sugan, nidaamsan oo joogto ah, iyadoo la adeegsanayo Heshiisyada Shaqo ee Labo geesoodka ah.

▶ **Jaantuskan Tusaalaha ah Wuxuu Muujinayaa Doorka Hay'adaha kala duwan ee Fulinta Siyaasaddan**



## 4.4. Qaabdhismeedka Hay'adaha

Doorarka muhiimka ah ee Hay'adaha kala duwan ay ku leeyihiin hirgelinta siyaasaddan waa:

| Hay'adda | Mas'uuliyadaha Fulinta Siyaasadda |
|---|---|
| Xafiiska Ra'isul Wasaaraha DFS | ▶ Iskudubbaridka Wasaaradaha, hay'adaha iyo waaxyaha si loo hubiyo hirgelinta waxtarka leh ee waajibaadkooda iyo in la soo gudbiyo warbixinno la xiriira tallaabooyinka lagu gaari karo yoolalka siyaasadda.<br>▶ Wakiil ka noqoshada dalka shirarka goboleed iyo kuwa caalamiga ah ee la xiriira socdaalka shaqaalaha. |
| Baarlamaanka | ▶ In la xaqiijiyo in dhaqaale iyo agab ku filan loo qoondeeyo fulinta siyaasadda<br>▶ Sameynta, dib u eegista iyo kormeerka hirgelinta siyaasadda.<br>▶ Dejinta, dib u eegista iyo la socodka dhaqangelinta siyaasadda |
| Xafiiska Ergayga Gaarka ah ee Socdaalka Madaxweynaha | ▶ Bixinta Taageerada Soo noqoshada, iyo Xuquuqda Carruurta |
| Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda | ▶ Dib u eegista Sharciyada iyo Siyaasadaha<br>▶ Matalaad Sharci<br>▶ Bixinta Talo Sharciyeed ku saabsan Ilaalinta Xuquuqda Shaqaalaha Socdaalka<br>▶ Bixinta Talo Sharciyeed ee hannaanka Xallinta Khilaafaadka<br>▶ Wada shaqeynta Hay'adaha kale ee Sharci<br>▶ Dabagalka Saameynta Sharciga ee Socdaalka Shaqaalaha<br>▶ La talinta Xeerarka Socdaalka iyo Shaqaaleysiinta<br>▶ Soojeedinta dib u habaynta Xeerarka Socdaalka Shaqaalaha |
| Hannaanka Iskuduwidda Qaranka | ▶ Isku dubbaridka guddi hoosaadyada iyadoo la adeegsanayo hab Qaran iyo hab bulsho si loo wadaago xogta, loona xoojiyo jawaabaha isku dubbaridan ee heer qaran ee mudnaanta la siinayo arrimaha socdaalka, oo ay ku jirto socdaalka shaqaalaha. |
| Guddiga Iskuduwidda Qaranka ee Socdaalka Shaqaalaha Soomaaliya | ▶ Guddigan oo uu shir guddoominayso Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada (MoLSA), wuxuu ka koobnaanayaa wakiillo ka socda hay'adaha muhiimka ah ee Dawladda iyo wada hawl galeyaasha bulshada. Ujeeddada ugu weyn ee guddigan waa in la xoojiyo isku xirka daneeyeyaasha kala duwan iyo in la hubiyo hirgelinta siyaasadda si mideysan oo isku dhafan. |
| Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada | ▶ Hoggaaminta guud hagidda iyo taageerada farsamo si loo fududeeyo hirgelinta siyaasaddan.<br>▶ Dhisidda iyo iskudubbaridka xafiis isku xir Qaran si loo kormeero hirgelinta siyaasadda.<br>▶ Wada-xaajood la yeelashada bahwadaagta horumarineed si loo abaabulo kheyraad.<br>▶ Iskudubbaridka miisaaniyadda, qorsheynta istiraatijiga ah, sharciyeynta iyo hirgelinta siyaasadaha waaxyaha kala duwan.<br>▶ Fududeynta dhammeystirka Heshiisyada Labo geesoodka ee Socdaalka Shaqaalaha (BLMAs).<br>▶ Kormeerka la jaanqaadidda, hirgelinta, iyo warbixinta heerarka caalamiga ah ee shaqaalaha.<br>▶ Bixinta rukhsadaha shaqada.<br>▶ Hagidda habraacyada guud iyo adeegyada la xiriira shaqaalaha Soomaaliyeed ee dibadda u socda shaqo doon.<br>▶ Hoggaaminta hirgelinta Nidaamka Xogta Suuqa Shaqada, iyadoo lala kaashanayo Hay'adda Qaranka ee Istaatistikada (Tirokoobka) Soomaaliya, si loo soo saaro, loona maareeyo, lana faafiyo xogta socdaalka shaqaalaha. |
| Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga ah | ▶ Martigelinta Waaxda Qurbo joogta, taasoo kormeerta hirgelinta siyaasadda Qaran ee jaaliyadda dibadda. Siyaasaddan waxay xiriir dhow la leedahay socdaalka shaqaalaha, sida lagu xusay dukumentigan."<br>▶ Taageeridda dadaallada iyo habraacyada sharciyeynta ee lagu hirgelinayo siyaasadda socdaalka shaqaalaha gudaha iyo dibadda.<br>▶ Taageeridda dejinta iyo dhaqangelinta Heshiisyada Labo geesoodka ee Socdaalka Shaqaalaha si loo hubiyo in shaqaalaha ay helaan faa'iidooyin wanaagsan. Fududeynta shaqada safaaradaha, qunsuliyadaha iyo xafiisyada diblomaasiyadeed si ay u taageeraan qurbo joogta. |

| Hay'adda | Mas'uuliyadaha Fulinta Siyaasadda |
|---|---|
| Wasaaradda Waxbarashada,Hiddaha iyo Tacliinta sare | ▶ Aqoonsiga shahaadooyinka iyo xirfadaha shaqaalaha socdaalka ee gudaha iyo dibadda.<br>▶ Taageeridda horumarinta xirfadaha ee machadyada Waxbarashada Farsamada iyo Tababarka Xirfadaha (TVET) iyo jaamacadaha, iyadoo si gaar ah diiradda loo saarayo heerarka waxbarashada ilaa heer Diploma.<br>▶ Waa in la ogaadaa in waajibaadka Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada (MoLSA) uu daboolayo horumarinta xirfadaha ilaa heer Diploma, halka Wasaaradda Waxbarashadu ay mas'uul ka tahay waxbarashada ka sarreysa heerka Diploma. |
| Wasaaradda Amniga Gudaha | ▶ Maareynta habraacyada dhalashada, socdaalka iyo maamulka kastamada<br>▶ Taageeridda tallaabooyinka waxtarka leh ee xuduudaha si loo fududeeyo socdaal ammaan ah oo nidaamsan. |
| Wasaaradda Qorsheynta, Maal-gashiga, iyo Horumarinta Dhaqaalaha | ▶ Taageeridda qaabeynta iyo hirgelinta siyaasadaha kobcinaya shaqosiinta, qorsheynta iyo miisaaniyadda.<br>▶ Bixinta taageero dhaqaale si loo hirgeliyo siyaasadaha, iyadoo la hubinayo in kheyraadka si hufan loo qoondeeyo lagana xisaabtamo. hirgelinaysaa nidaam xisaabeed hufan si loo xaqiijiyo in kheyraadka la isticmaalo si waafaqsan baahiyaha shaqaalaha |
| Wasaaradda Horumarinta Qoyska iyo Xuquuqda Aadanaha | ▶ Ilaalinta xuquuqda shaqaalaha socdaalka.<br>▶ Dhiirrigelinta sinnaanta jinsiga ee socdaalka shaqaalaha.<br>▶ Bixinta taageero loo fidinayo kooxaha nugul ee shaqaalaha socdaalka.<br>▶ Sii wadidda u doodista iyo bixinta kaalmo sharciyeed ee shaqaalaha socdaalka.<br>▶ La shaqeynta hay'adaha xuquuqda aadanaha ee caalamiga ah.<br>▶ Horumarinta siyaasado la xiriira dib u midoobidda qoysaska.<br>▶ Dabagalka iyo soo saarista warbixinnada la xiriira daryeelka shaqaalaha socdaalka.<br>▶ Hirgelinta ololayaal wacyi gelin iyo barnaamijyo waxbarasho oo ku saabsan xuquuqda shaqaalaha socdaalka.<br>▶ Iskudubbaridka barnaamijyada ilaalinta bulsho ee shaqaalaha socdaalka.<br>▶ Hubinta in siyaasadaha iyo xeerarka ay la jaan qaadaan heerarka xuquuqda aadanaha. |
| Wasaaradda Caafimaadka | ▶ Qiimeynta xaaladda caafimaadka shaqaalaha iyo go'aaminta baahiyaha daryeel caafimaad.<br>▶ waxay hubinaysaa in dhammaan shaqaalaha helaan caymis caafimaad iyo adeegyada lagama maarmaanka ah.<br>▶ Wasaaradda Caafimaadka waxay xoojinaysaa dadaallada lagu ilaalinayo caafimaadka dadweynaha iyo ka hortagga cudurrada faafa.<br>▶ Iskaashi lala yeesho hay'adaha caalamiga ah si loo xoojiyo nidaamka daryeelka caafimaadka shaqaalaha.<br>▶ Cilmi baarisyo joogto ah iyo dabagal lagu sameeyo xaaladaha caafimaadka si loo hagaajiyo adeegyada caafimaad.<br>▶ Hirgelinta barnaamijyo wacyigelin caafimaad ah si bulshada loogu baraarujiyo muhiimada nadaafadda iyo ka hortagga cudurrada.<br>▶ Xuquuqda caafimaad ee shaqaalaha socdaalka waa in la ilaaliyo oo la hormariyo si ay helaan daryeel caafimaad oo habboon. |
| Hay'adda Qaranka ee Istaatistikada (Tirokoobka) Soomaaliya | ▶ Qorsheynta iyo sameynta sahanno si loo ururiyo xog muhiim ah oo ku saabsan socdaalka shaqaalaha.<br>▶ Ururinta iyo faafinta tirokoobka si loogu daro Nidaamka Macluumaadka Suuqa Shaqada (the Labour Market Information System LMIS).<br>▶ In la taageero maamul daadejinta iyo kala soocidda adeegyada tirokoobka iyo bixinta kaalmo farsamo oo ku saabsan soo saarka tirokoobka shaqada.<br>▶ In la diiwaan geliyo oo la faafiyo daraasaadka cilmi baarista iyo qiimeynta mowduucyada ee isbeddellada soo baxaya ee qorsheynta shaqaalaynta, iyadoo la siinayo aragtiyo siyaasadeed si loo ogeysiiyo hirgelinta. Ka qeyb qaado hirgelinta Nidaamka Macluumaadka Suuqa Shaqada, iyadoo la kaashanaysa Wasaaradda Shaqada (MoLSA), si loo soo saaro, loona maareeyo oo lana faafiyo xogta socdaalka shaqada. |

| Hay'adda | Mas'uuliyadaha Fulinta Siyaasadda |
|---|---|
| Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda | ▶ Bixinta fiisooyinka iyadoo la raacayo xeerarka la dejiyey. Difaacida xakamaynta xuduudaha iyo sharciyada socdaalka. Dukumentiga iyo diiwaangelinta shaqaalaha socdaalka.<br>▶ Sameynta qiimeyn ku saabsan suuqa shaqada iyo go'aaminta tirada shaqaalaha loo baahan yahay.<br>▶ Wada shaqeynta lala yeesho loo shaqeeyeyaasha iyo shirkadaha shaqaaleysiinta. Kormeerka iyo hirgelinta shuruudaha shaqo ee loo shaqeeyeyaasha shaqaalaha socdaalka.<br>▶ Isku xirnaanta hay'adaha kale ee Dawladda.<br>▶ Hubinta in la raaco heerarka caalamiga ah ee socdaalka."<br>▶ Sameynta ololayaal wacyigelin dadweyne oo ku saabsan socdaalka.<br>▶ Ka jawaabista wax ka qabashada dhibaatooyinka socdaalka ama xaaladaha deg degga ah |
| Hay'adaha Horumarinta ee Caalamiga ah | ▶ Inay gacan ka geystaan abaabulka ilaha dhaqaale si loo xaqiijiyo hirgelinta qodobbada siyaasaddan.<br>▶ Bixinta kaalmo farsamo inta lagu jiro muddada fulinta siyaasadda, sida loo baahan yahay, oo ay ku jiraan sameynta dib u eegis istiraatijiyadeed, qiimayno iyo daraasado kale.<br>▶ In la wadaago hababka ugu wanaagsan ee caalamiga ah ee socdaalka shaqada. |
| Dawlad Goboleedyada | ▶ Ku darista qorsheynta shaqada iyo isku xirnaanta arrimaha shaqada iyo shaqaaleysiinta heer Dawlad Goboleed.<br>▶ In ay kormeeraan hirgelinta siyaasadaha heer degaan.<br>▶ Hubinta shaqaaleysiinta iyo dejinta shaqaalaha kormeerayaasha shaqada.<br>▶ Fulinta sharciga shaqada.<br>▶ Taageeridda hirgelinta sharciga shaqada iyo adeegyada shaqaaleysiinta la xiriira. |
| Kormeerayaasha Shaqada ee Heer Degmo | ▶ Dabagalka la socodka iyo dhaqangelinta heerarka shaqada iyo siyaasadaha socdaalka ee heer degmo. |
| Wada hawlgalayaasha Bulshada | ▶ Taageeridda u hoggaansanaanta heerarka iyo xeerarka la dejiyey.<br>▶ Difaacista horumarinta xuquuqda shaqaalaha, ilaalinta iyo wada-xaajoodka guud.<br>▶ Sameynta cilmi baaris, keydinta iyo diiwaan gelinta iyo wadaagista natiijooyinka si loo taageero hirgelinta siyaasadda. |
| Ganacsiga Gaarka Ah | ▶ Dhammeystirka dadaallada Dawladda iyadoo la siinayo khibrad, dakhli iyo hal abuurnimo dhinaca shaqada.<br>▶ Abuurka fursado shaqo, oo ay ku jiraan horumarinta teknoolajiyada iyo hal abuurka.<br>▶ Taageeridda tababarada warshadaha, tababarada shaqada iyo shaqooyinka tababarka.<br>▶ Kobcinta iskaashiga Dawladda iyo Ganansiga gaarka ah ee shaqo abuurka. |
| Dhaq dhaqaaqayaasha Aan Dawliga Ahayn (NGOs iyo Ururrada Bulshada Rayidka ah (CSOs), Jaamacadaha, Warbaahinta) | ▶ La shaqeynta Dawladda si loo xaqiijiyo hirgelinta waxtarka leh ee barnaamijyada horumarinta shaqo.<br>▶ Difaacista u hoggaansanaanta heerarka shaqada iyo xeerarka si loo ilaaliyo xuquuqda shaqaalaha socdaalka.<br>▶ Taageeridda iyo ka qeyb qaadashada tababarka iyo cilmi baarista dhinacyada kala duwan ee shaqo abuurka.<br>▶ Aqoonsiga iyo la wadaagista dhaqamada ugu wanaagsan ee wada hawl galayaasha bulshada.<br>▶ Difaacista nidaamyada dabagalka iyo kormeerka si loo hubiyo u hoggaansanaanta heerarka ugu hooseeya ee shaqada iyo sharciga.<br>▶ Faafinta mabda'a siyaasaddan iyadoo loo marayo warbaahinta kala duwan. |

# 5

# Maaliyadda iyo soo ururinta kharashaadka

1. Dawladda ayaa hoggaaminaysa dadaallada lagu dhaqaajinayo kheyraadka dhaqaale, farsamo iyo midka hawlgalka si loo taageero hirgelinta siyaasadda. Qodobbada muhiimka ah ee kheyraadka ah ee ay ku jiraan: Taageeridda shaqada joogtada ah ee Guddiga Isku xirka Siyaasadda Qaranka warbixinta u soo gudbisa NCM.

2. Dhisidda nidaam xogta suuqa shaqada oo si buuxda u shaqeynaya.

3. Xoojinta awoodda hay'adaha si loo hirgeliyo siyaasadaha si waxtar leh dhammaan heerarka.

4. Iyadoo la tixgelinayo caqabadaha kheyraadka iyo dhaqaalaha, Dawladda waxay isticmaalaysaa hababka maalgelinta kala duwan, oo ay ku jiraan: Kheyraadka loo qoondeeyo Wasaaradaha, Waaxyaha, Hay'adaha iyo Dawlad Goboleedyada ka tirsan miisaaniyadda Qaranka; Taageero ka timid bah wadaagta horumarinta (oo ay ku jiraan ILO, IOM, UNOCHA, UNHCR, UNDP, World Bank, Islamic Bank, GIZ iyo bah wadaagta horumarinta ee labada iyo ka badan).

5. Kheyraadka laga helo gudaha dalka iyadoo loo marayo ilaha canshuurta iyo kuwa aan canshuurta ahayn (tusaale ahaan, ururinta lacagaha la bixiyo ee Visas, rukhsadaha shaqada iyo khidmadaha ay bixiyaan Shirkadaha Shaqosiinta Gaarka ah, iyo diiwaangelinta ganacsiga; iyo kuwa kale).

6. Dhaqaalaha laga helo iskaashiga Dawladda iyo ganacsiga gaarka ah (PPPs) ee ku saabsan tallaabooyinka la qaado oo ay iskaashanayaan Dawladda iyo ganacsiga gaarka ah, iyo bah wadaagta horumarinta kale.

7. Deeqaha, amaahda (oo ay ku jiraan amaahda dhaqaalaha yar ee mudnaanta leh) ee Dawladda ay raadsan karto si loo taageero tallaabooyinka muhiimka ah ee taageeraya habka socdaalka shaqaalaha.

8. Isticmaalka Sanduuqyada Maalgelinta Gaarka ah iyo xirmooyinka kale ee maaliyadeed ee hay'adaha maaliyadeed, ururrada caalamiga ah iyo CSOs oo taageeraya maamulka socdaalka shaqaalaha ee IGAD, COMESA iyo meel ka baxsan.

9. Ilaha kale ee maalgelinta (tusaale ahaan, maalgelinta cimilada oo xallinaysa dhibaatooyinka masiibooyinka ka dhasha cimilada ee keena barakac dadka iyo socdaalka qasabka ah; iyo sidoo kale ururinta lacagaha laga helo xubnaha qurbo joogta).

In kasta oo Dawladda ay hoggaaminayso ururinta kheyraadka lacagaha si loo hirgeliyo siyaasaddan, waxay dooneysaa in ay dhiirrigeliso daneeyeyaasha kale inay ka qeyb qaataan ururinta kheyraadka. Tani waxaa lagu gaarayaa iyadoo la maalgelinayo mashaariic soo saaraysa lacag iyo taageero farsamo oo loogu talagalay hirgelinta siyaasadda. Wada hawl galayaasha bulshada, hay'adaha gaarka loo leeyahay, ururrada aan Dawliga ahayn (NGOs) iyo ururrada bulshada rayidka ah sida shirkadaha shaqaaleysiinta waxaa lagu taageerayaa sameynta soo jeedin lacag ururin ah oo loo gudbinayo hay'adaha horumarinta badan, ururrada Qaramada Midoobay, bankiyada horumarinta iyo hay'adaha kale ee maalgelinta horumarinta ee bixiya maalgelinta muddada dheer iyo taageerada farsamo.

Kheyraadka loo baahan yahay hirgelinta siyaasadda waa farsamo iyo hawlgal, taasoo u baahan in la qaato kaabayaasha cusub ee adag iyo jilicsan. Sidaas darteed, hababka maalgelinta iyo ururinta kheyraadka waxay ku jiriya aqoonsiga baahiyaha aan maaliyadeed ahayn ee kaalin muhiim ah ka ciyaara maamulka socdaalka shaqaalaha. Baahiyahaas waxaa ka mid ah:

1. Qalabka lagu xakameeyo xuduudaha, sida kamaradaha CCTV, qalabka baarista, qalabka gelinta xogta iyo falanqaynta, kaabayaasha amniga internetka, iyo tababarada la xiriira isticmaalka qalabkan. Iyadoo ay socdaalka shaqaalaha yahay arrin ka baxsan hal waax, waxaa muhiim ah in dhammaan hay'adaha lagu aqoonsaday qorsheyaasha hirgelinta ay iskugu keenaan kheyraadka si ay ugu sameeyaan maalgelin istiraatiji ah oo ay kor u qaaddo guulaha siyaasaddan.

2. Hufnaanta iyo mas'uuliyadda ayaa muhiim u ah in la xaqiijiyo isticmaalka kheyraadka la ururiyey ee ugu wanaagsan. Dawladda waxay sii wadaysaa dadaallada lagu dhisayo awoodda Wasaaradaha, waaxyaha, hay'adaha iyo Dawlad Goboleedyada si loo hubiyo isticmaalka kheyraadka ugu wanaagsan, iyadoo la xaqiijinayo in hirgelinta siyaasadda lagu sameeyo si hufan oo mas'uuliyad leh.

# 6

# Hababka isgaarsiinta

Si loo abuuro wacyigelin iyo fahamka ku saabsan siyaasaddan, Dawladda ayaa adeegsanaysa habab isgaarsiineed iyo kanaallo kala si ay ugu dhiirrigeliso daneeyeyaasha taageero u fidinaya hirgelinta siyaasadda. Ujeeddada isgaarsiinta waa in la kor loo qaado masuuliyadda ee daneeyeyaasha kala duwan ee ku saabsan habraacyada socdaalka shaqaalaha, hawlgallada xeer dejinta, xuquuqda shaqaalaha socdaalka, iyo fursadaha shaqo ee Soomaaliya iyo dalalka loo socdaalo. Kala duwanaanshaha dadka ayaa la gaarayaa iyadoo la adeegsanayo habab isgaarsiineed kala duwan, iyadoo lagu saleynayo baahiyaha iyo doorbidda ay qabaan. Tani waxay ku lug leedahay isticmaalka noocyo kala duwan oo macluumaad ah, kuwaasoo loo faafinayo kanaallo kala duwan, sida hoos ku xusan:

## 6.1. Gaarsiinta Xukuumadda iyo Hay'adaha kale ee Dawladda

Ka dib ansixinta siyaasaddan Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Dalxiiska ayaa adeegsanaysa kanaallo warbaahineed ballaaran iyo xeelado isgaarsiineed si loo faafiyo siyaasaddan, oo ay ku jiraan: barnaamijyada raadiyaha, telefishanka, agabyo macluumaad, waxbarasho iyo isgaarsiin, xayeysiisyada, buugaagta, joornaalada, warqadaha, boorar, iyo xayeysiisyo kale oo la mid ah.

Dawladda federaalka iyo Dawladaha xubnaha ka ah ayaa taageeraya inay la shaqeeyaan dhaq dhaqaaqayaasha aan Dawliga ahayn iyo qeybta gaarka loo leeyahay si ay u helaan jawaab celin ka timid muwaadiniinta ku saabsan waxtarka siyaasadda. Jawaabaha laga helayo ayaa noqonaya saldhigga Dawladda ay ka bilaabaysaa tallaabooyin waafaqsan si looga jawaabo arrimaha soo bixaya. Xogta laga ururiyo habraacyadan isgaarsiineed waxaa lagu darayaa xarunta xogta dhexe ee Nidaamka Kheyraadka Socdaalka ee Dijitaalka ah. Tani waxay noqonaysaa meel keydinta iyo maareynta dhammaan xogta socdaalka shaqaalaha iyo habka ilaa heerarka federaalka iyo Dawlad Goboleedyada, iyadoo la adeegsanayo kanaallo isgaarsiineed oo ku habboon.

## 6.2. Gaarsiinta Wada hawlgalayaasha Bulshada

Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada, oo qeyb ka ah habka saddex geesoodka ah iyo xulafada la shaqeeya ilaa heerka degmo, waxay adeegsanaysaa shabakado iyo dhacdooyinka wadahadalka bulshada, shirarka, aqoon is weydaarsiyada, faafinta warsidaha iyo hawlgallada warbaahinta kale si ay u dhaqangasho siyaasaddan. Dawladda ayaa taageeraysa booqashooyinka is dhaafsan iyo qaban qaabinta munaasabadaha lagu soo bandhigayo tusaalooyinka ugu wanaagsan ee ku saabsan socdaalka shaqaalaha, taasoo dhiirrigelisa habab cusub iyo nidaamyada waxtarka leh.

## 6.3. Gaarsiinta Shaqaalaha Socdaalka Soo Gelaya iyo Kuwa Ka Baxaya

Si looga hadlo shaqaalaha socdaalka ee ka baxaya dalka, MoLSA waxay dhisaysaa goobo is dhexgal ah, oo ay ku jiraan barnaamijyo raadiyo iyo telefishan, shirar, kulammo bulshada, is dhexgal online ah oo ay la sameynayaan muwaadiniinta Soomaaliyeed ee qurbo joogta ah, iyo sidoo kale barnaamijyada warbaahinta bulshada iyo bogga internetka si loo faafiyo mabaadi'da muhiimka ah ee siyaasaddan. Shaqaalaha soo gelaya, fariimo si gaar ah loo diyaariyey ayaa loo sameynayaa si looga daboolo baahiyaha macluumaad ee kala duwan ee shaqaalaha u socda Soomaaliya. Fariimahaan waxay ka hadlayaan siyaasaddan, siyaasadaha la xiriira, nidaamyada sharciga, iyo adeegyada Dawladda ee taageeraya shaqaalaha. Dhanka kale, FESTU waxay adeegsanaysaa Xarunteeda Socdaalka si ay siyaasaddan ugu faafiso daneeyeyaasha ay khuseyso.

## 6.4. Gaarsiinta Dawladaha Dalalka Martida Loo Yahay

Dawladdu waxay adeegsanaysaa safaaradaheeda, wakiillada iyo qunsuliyadaha dibadda, iyo sidoo kale teknoolajiyada casriga ah iyo codsiyada isgaarsiinta, si loo xaqiijiyo isgaarsiin waxtar leh iyo wadaagista macluumaadka la xiriira Dawladaha dalalka loo socdo. Dawladda ayaa sidoo kale ka faa'iidaysanaysaa kanaallo isgaarsiineed dijitaal ah si ay uga wargeliso dadka gudaha iyo dibadda ee daneeyeyaasha muhiimka ah horumarka gobolka iyo heerarka caalamiga ah ee socdaalka shaqaalaha.

## 6.5. Helitaanka Fal celinta/Jawaab celinta

Si loo hubiyo habka gaarsiinta ee labo geesoodka ah, Dawladdu waxay dejinaysaa nidaam danabeysan ah oo lagu maamulo cabashooyinka, xarun wicitaan oo leh khad lacag la'aan ah oo loogu talagalay weydiimaha dadweynaha, isla markaana leh aaladaha is dhexgalka bulshada. Marka la is weydaarsado macluumaadka ku saabsan siyaasaddan iyo hirgelinteeda, fal celinta ama jawaab celinta daneeyeyaasha la helo ayaa loo baaraan degayaa si ay gacan uga geysato horumarinta joogtada ah ee nidaamka. Habkan wada xiriirka ah wuxuu kor u qaadayaa qaddarinta wadajirka ah ee ka qeyb qaadashada socdaalka shaqadu ku leeyahay horumarinta Qaranka.

Guud ahaan, isgaarsiinta ku saabsan siyaasaddan waxay noqonaysaa hannaan labo geesood ah. Dhanka kale Dawladdu waxay sii wadaysaa qabashada jawaab celinada /fal celinada dhammaan dadka ay khusayso iyadoo loo marayo ka qeyb galyo kala duwan oo is dhexgal ah oo ku saabsan arrimaha la xiriira hirgelinta siyaasaddan. Is dhex galkaani wuxuu fursad siinayaa daneeyeyaasha siyaasaddan si ay uga wada hadlaan arrimaha muhiimka ah oo ay ku heshiiyaan isbeddellada la soo jeediyey ama dib u habaynta laga yaabo inay soo baxaan ama loo baahdo muddo ka dib.

# 7

# Qaabdhismeedka kormeerka, qiimeynta iyo barashada

Habka Iskuduwidda Qaranka wuxuu hubinayaa in hirgelinta siyaasaddan si joogto ah loo kormeero oo la qiimeeyo si loo ogaado heerka gaaridda himillooyinkeeda, hawlgalka iyo natiijooyinka. In kasta oo Wasaaradda Shaqada ay kormeerto hirgelinta siyaasadda, habka sare ayaa qaadaya doorka kormeerka heer sare ah. Waxqabadka hirgelinta siyaasaddan waxaa lagu qiimeynayaa iyadoo lala barbar dhigo Qorshaha Horumarinta Qaranka ee Soomaaliya iyo halka loo marayo in la gaaro Ujeeddooyinka Horumarinta Waara ee Qaramada Midoobay. Intaas waxaa sii dheer, siyaasaddan waxaa lagu qiimeynayaa iyadoo la tixraacayo saameynta ay ku leedahay siyaasadda guud ee socdaalka dalka, iyadoo la tixgelinayo socdaalka shaqaalaha sida qeyb ka mid ah qaabdhismeedka siyaasadda socdaalka guud.

## 7.1. Kormeerka

Qaabdhismeedka Kormeerka iyo Qiimeynta ee socdaalka shaqaalaha hadda waxaa maamula Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulsahda, oo wada shaqeyn la leh Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha iyo Hay'adda Istaatitikada Qaranka ee Soomaaliya. iyadoo hoos timaada siyaasaddan, cid kasta oo hirgelinaya /ka qeybgal kasta oo hirgelinaya ayaa kormeeraya hawlgallada oo warbixin ka siinaya horumarka sanadlaha ah, iyadoo la raacayo Tilmaamayaasha Waxqabadka Muhiimka ah (Key Performance Indicators KPIs). Sahan aasaasi ah ayaa lagu sameynayaa sannadka ugu horeeya si loo ururiyo xogta bilowga ah ee ku saabsan socdaalka shaqaalaha, iyadoo la dejinayo yoolalka siyaasadda. MoLSA ayaa iskudubbaridaya macluumaadka ka soo ururay hay'adaha kala duwan warbixin sannadeedka waxqabadka. Dhisidda nidaam xogta suuqa shaqada ee shaqeyneysa ayaa siinaya xogta shaqada ee la cusbooneysiiyey, taasoo ka dhigaya habkan mid ka sahlan. LMIS waxay keydinaysaa tilmaamayaasha socdaalka shaqaalaha iyo KPIs, taasoo suurtogal ka dhigeysa Sahlidda muuqaalka horumarka muddo waqti. Dib u eegisyada sanadlaha ah ayaa lagu cabbirayaa horumarka, waxaana warbixinnada la soo gudbinayaa kulammada Guddiga Iskuxirka Qaranka. Natiijooyinka waxaa la wadaagayaa NCM si loo muujiyo horumarka. Si loo hubiyo Kormeerka iyo Qiimeynta wax ku ool ah, waxaa la dhisayaa qaabdhismeed iyo qorshe hawleed kormeer iyo qiimeyn ah si loo raadiyo horumarka hirgelinta siyaasadda. Dib

u eegista farsamo ee soo gudbinta waxay iftiiminaysaa meelaha u baahan in fiiro gaar ah loo yeesho, iyadoo Dawladda ay qaadaya tallaabooyin ku habboon sannadaha hirgelinta ee soo socda. Habkani wuxuu sidoo kale ka koobnaanayaa falanqaynta baahiyaha kheyraadka dhaqaale, farsamo, hawlgal iyo kuwo kale.

## 7.2. Qiimeynta

Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulsahda ayaa hoggaaminaysa kormeerka joogtada ah ee hirgelinta iyo amrada qiimeynada. Dib u eegista dhex dhexaadinta waxay qiimeynaysaa horumarka bartamaha muddada hirgelinta, iyadoo la bixiyo talooyin lagu saxo qaabdhismeedka hirgelinta siyaasadda. Dhammaadka muddada hirgelinta siyaasadda, MoLSA ayaa amraysa qiimeyn dhammeystiran si loogu wargeliyo qaabeynta siyaasadda beddelka ah, toban sano ka dib hirgelinta.

## 7.3. Barashada

Kormeerka joogtada ah ee waxqabadka iyo sidoo kale qiimeynnada gudaha ee madaxa bannaan, waxaa lagu sameynayaa si loo bixiyo macluumaad ku saabsan barashada xogta. Waaxda qorsheynta siyaasadda iyo Dabagalka iyo Qiimeynta ee Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada ayaa hoggaaminaysa in macluumaadkan uu gaaro sameeyeyaasha siyaasadda, taasoo ka caawineysa inay dib u eegaan oo ay taageeraan helitaanka natiijooyinka siyaasadda ee la filayo. Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada ayaa u gudbinaysa natiijooyinka hirgelinta siyaasadda, iyadoo soo bandhigaysa warbixinnada iyo talooyin ay uga soo baxaan Wasaaradda Qorsheynta iyo Hay'adda Istaatikada Qaranka. Faa'idada ugu dambeysa ee Dabagalka iyo Qiimeynta waa barashada joogtada ah ee hagaajinta nidaamka, taasoo u sahlaysa in la gaaro yoolalka siyaasadda, hawlgalka iyo himillooyinka.

# ERAY BIXIN

**"Wada xaajoodka Wadajirka ah"** waxaa loola jeedaa hannaanka wada hadalada u dhexeeya loo shaqeeyeyaasha ama ururrada loo shaqeeyeyaasha dhinacooda iyo ururrada shaqaalaha dhinacooda, oo loogu talagalay in lagu go'aamiyo xaaladaha shaqo, shuruudaha shaqosiinta, xeerarka, xiriirka u dhexeeya loo shaqeeyeyaasha iyo shaqaalaha.

**"Siyaasadaha Tixgelinta Jinsiga"** waxaa loola jeedaa tallaabooyin istiraatiji ah oo si gaar ah loogu talagalay in lagu garowsado in ragga iyo dumarkuba ay u socdaalaan sababo dhaqaale iyo fursado shaqo oo wanaagsan, balse shaqaalaha haweenka ah ay la kulmaan caqabado badan, dulmi, iyo takoor heer kasta oo socdaalka ahba. Siyaasaddan waxay diiradda saaraysa yareynta caqabadaha iyo xaqiijinta sinnaanta jinsiga ee dhammaan marxaladaha socdaalka.

**"Xalka Waara"** waxaa loola jeedaa iyadoo la tixracaayo tallaabooyin la dejiyey oo bixiya fursado ay haystaan qaxootiga soo-noqdayaasha, ama dadka gudaha ku barakacay kuwaasoo aan mar dambe u baahnayn gargaar iyo ilaalin gaar ah. Tallaabooyinkan waxay u oggolaanayaan inay si waara u helaan xuquuqdooda aasaasiga ah ee dastuuriga ah iyo xuquuqda aadanaha, iyagoo si deggan oo sharaf leh ugu dhex noolaan kara bulshadooda.

**"Ka ganacsiga Dadka"** waxaa loola jeedaa hawlo ay ka mid yihiin qorista, qaadista, kala wareejinta, qarinta, ama helidda dad si loo isticmaalo. Sidoo kale, waxaa loo yaqaan **Ka ganacisiga Dadka** sida ku cad **Heshiiska Palermo**. Ganacsigan waxaa lagu fuliyaa iyadoo la adeegsanayo cabsi gelin, xoog, ama qaabab kale oo qasab ah, afduub, khiyaano, marin habaabin, ama xadgudub awood, ka faa'idaysi qof nugul oo xaalad adag ku sugan, bixinta ama helidda lacag ama faa'iidooyin si qof kale loo maamulo. Ujeeddada ugu weyn ee ka ganacsiga dadka waa ka faa'idaysiga dadka, taasoo noqon karta shaqo qasab ah, addoonsi, ka ganacsiga jirka, ama xadgudubyo kale oo bani'aadannimo.

**"Nidaamka Xogta Suuqa Shaqada"** waxaa loola jeedaa shabakad isku xirta hay'adaha, shakhsiyaadka, iyo ilaha macluumaadka oo leh door heshiisyo, iyo hawlo la wada aqoonsan yahay oo la xiriira soo saarista, keydinta, faafinta, iyo isticmaalka macluumaadka suuqa shaqada.

Nidaamkani wuxuu higsanayaa in uu sare u qaado awoodda sameynta iyo hirgelinta siyaasadaha iyo barnaamijyada la xiriira xogta suuqa shaqada

**"Siyaasadda Socdaalka Shaqaalaha ee Tixgelinta Jinsiga"** waxaa loola jeedaa Siyaasaddan waxay aqoonsanaysaa in ragga iyo dumarku labaduba ay u socdaalaan sababo dhaqaale iyo fursado shaqo oo wanaagsan, iyadoo la tixgelinayo khibradaha kala duwan ee socdaalka ee ragga iyo dumarka. Waxay sidoo kale aqoonsanaysaa in shaqaalaha dumarka ah ee socdaalka ay la kulmaan fursado yar iyo takoor inta lagu jiro socdaalka, iyagoo wajahaya dhibaatooyin, sida xayiraadaha shaqo, shuruudaha waxbarasho, iyo xagjirnimo, taasoo badanaa sii xumaysa iyadoo ay jiraan dhibaatooyin kale oo lagu wajahayo, iyadoo loo marayo caddaalad darro is-dabajoog ah oo ku saleysan arrimo badan.

**"Socdaalka Shaqaalaha"** waxaa loola jeedaa Socdaalka shaqaalaha ee ka dhaca dalalka kala duwan ama gudaha dalka ay ku nool yihiin si ay u helaan shaqo.

**"Heerka Ka qeybgalka Suuqa Shaqada"** waxaa loola jeedaa awoodda shaqaalaha ee shaqada, boqolkiiba dadka da'da shaqada ku jira, ayaa muujinaysa heerka ka qeybgalka suuqa shaqada.

**"Xoogagga Shaqada (Labour Force)"** waxaa loola jeedaa dhammaan dadka ku jira da'da shaqada, kuwa shaqeeya iyo kuwa aan shaqeyn.

**"Shaqaalaha Socdaalka"** waxaa loola jeedaa Qof socdaal ah ama qof ka soo guuray dal kale si uu shaqo u helo.

**"Socdaal"** waxaa loola jeedaa Dhaq dhaqaaqa dadka ee meel ka mid ah adduunka oo dhan, oo inta badan isaga gudba masaafo dheer oo ka mid ah wadan ilaa wadan kale ama gudaha waddanka, iyadoo socdaalka guduhu yahay qaabka ugu badan ee socdaalka aadanaha ee adduunka.

**"Bad qabka iyo Caafimaadka Goobta Shaqada"** waxaa loola jeedaa Meeleynta iyo ilaalinta shaqaalaha ee degaanka goobta shaqada oo la waafajiyey awoodahooda jireed iyo maskaxeed.

**"Wareejin Karaanka Xuquuqda"** waxaa loola jeedaa Qaadashada Tallaabooyinka loogu talagalay in lagu ilaaliyo xuquuqaha la helay ama habka helitaanka iyo bixinta manfacyada si ballaaran. Wareejintu waxay u baahan tahay iskaashi ka dhexeeya wadamada martida loo yahay iyo kuwa asal ahaan laga soo jeedo.

**"Shirkadaha Shaqosiinta Gaarka"** waxaa loola jeedaa qof dabiici ah ama qof leh shakhsiyad qaanuuneed ama hay'ad ka madax bannaan maamul Dawladeed, oo bixisa hal ama in ka badan adeegyada la xiriira shaqada, sida ku cad Qodobka 1aad ee Heshiiska Hay'adaha Shaqosiinta

Gaarka ah ee ILO 1997 (Lambarka 181). Sidoo kale, waxaa loo yaqaan shirkadaha shaqaaleysiinta.

**"Tababar Ka Hor Socdaalka"** waxaa loola jeedaa Habraacyada loogu talagalay dhisidda awoodda iyo bixinta macluumaad ku saabsan nidaamyada dalku galka (visa) iyo rukhsadaha shaqada, dukumentiyada loo baahan yahay, sharciyada khuseeya ee ilaalinaya shaqaalaha, hay'adaha la xiriiri kara marka loo baahdo, iyo xiriirka ururrada qurbo joogta ee dadka soo dhaweynaya.

**"Shaqaaleysiin"** waxaa loola jeedaa Hannaanka ka kooban xayeysiinta, faafinta macluumaadka, xulashada, meeleynta shaqo, iyo marka ay khuseyso, dib u celinta shaqaalaha socdaalaya (migrant workers) waddankii ay asal ahaan ka yimaadeen. Hannaankani wuxuu khuseeyaa shaqo doonayaasha iyo kuwa hore u shaqeynayey ee ku jira xiriirka shaqo

**"Waafaqsanaanta Xirfadaha"** waxaa loola jeedaa Habab iyo tallaabooyin lagu kordhinayo shaqo helidda shaqaalaha iyo yaraynta yaraanta xirfadaha iyadoo la buuxinayo shaqooyinka bannaan oo lagu meeleynayo shaqo doonayaal aqoon iyo xirfad u leh.

**"Wadahadalka Bulshada"** waxaa loola jeedaa Dhammaan noocyada wadahadallada, latashiga iyo isweydaarsiga macluumaadka ee u dhexeeya wakiillada shaqaalaha, loo shaqeeyeyaasha, iyo Dawladaha oo ku saabsan danaha guud ee siyaasadaha dhaqaale, shaqo iyo bulshada, iyadoo ujeeddadu tahay in la siiyo daneeyeyaasha cod iyo saameyn ku saabsan arrimaha khuseeya bulshooyinka iyo goobaha shaqada.

**"Wada hawlgaleyaasha Bulshada"** waxaa loola jeedaa Wakiillada maamulka iyo shaqaalaha (ururrada loo shaqeeyeyaasha iyo ururrada shaqaalaha), iyo xaaladaha qaarkood, hay'adaha Dawladda iyo bulshada rayidka ah, kuwaasoo door ka ciyaara arrimaha la xiriira xiriirka shaqo iyo kaqeyb qaadashada wadahadallada saddex geesoodka ah (tripartite discussions) ee lala yeesho Dawladda.

**"Daneeyeyaasha Saddex geesoodka ah (Tripartite Constituents)"** waxaa loola jeedaa Dawladda, ururrada loo shaqeeyeyaasha, iyo ururrada shaqaalaha.